

Afsoomaaliga
&
Warfaafinta Maanta

Axmed F. Cali "Idaajaa"

In kastoo aanu maanta lahayn dawlad u xil-qabta, isla markaasna aanu jirin guddi iyo hay'ado u gaar ah oo dibudhacii kolba uu muto ka samatabbixiya amaba lagala xisaabtamo, haddana afsoomaaligu wuxuu weli inaga mudan yahay inaynu sidan u dhaanno! Ku-dhowaad labaatan sano ayuu silic iyo saxariir ka dhergey. Ku-dhowaad labaatan sano ayaanu helin cid ka naxda iyo qolo u soo gurmata toona. Sidaas darteed, waa rajay oo hooyo ma laha, waa agoon oo aabbe looma oga, waana tolgaab oo cid uu u qayshadaa uma noola! Xataa, dagaal-oogeyaasha ay Soomaalidu ka wada haagtay midna kama uu helin, welina jabhad u dooddaa uma ay dhalan!

Waa af hodon ah oo, sokeeyaha ka hor, labadii qarni ee u dambeeyey ay si walba shisheeyaha daneeyaa u qirayeen hodontooyadiisa xagga erayada, maansada iyo, guud ahaan, suugaantiisa aan qornayn ee dadka ku hadlaa ay curiyaan, jecel yihiinna. Waa af fil weyn oo dhismaha weedhiisa, murtidiisa iyo maahmaahdiisaba laga garan karo qarniyo faro badan in lagu soo hadlaayey, sidaasna uu ku yeeshay astaamo u gaar ah oo xeerar ad'adag cuskan.

Sida qaar kale oo Afrikada Bari lagaga hadlo, waa af aan ka abuurmin afaf badaha shishadooda ka soo doolay iyo afguri gobolka horay uga jirey oo isdheehay, dabadeedna isku milmay! Waa af xiriir dhowi ka dhexeeyo kuwo kale oo Geeska Afrika lagaga hadlo sida afafka Cafarta iyo Oroomada. Waase af isku filan oo dhammidood ka madax bannaan, ayna caddahay inuu iskiis u koray.

Dhawr-iyo-soddon sano oo qura ayuu qornaa, sidaas oo ay tahayna waa af awood u yeeshay kasmooyinka iyo fikradaha casriga ah in looga helo eraybixin uu ummadda ku hadasha ugu gudbiyo. Afguri badan oo (dialects) kala kaan ah waa af aan lahayn oo inta ku hadashaayi ay dhib la'aan wax isugu gudbin karto, isuguna garan karto. Isku soo wada duub oo, waa dad la' yahay mooyee, waa af, isaga oo mudan, ku tirsami kara afafka nool ee daafaha dunida lagaga hadlo, waana af murtida uu xanbaarsan yahay awgeed uu, wadar ahaan, aadanuhu wax ka korosan karo.

* * *

Milgada sidaas u weyn afka lihi sow, kolka, inagama mudna in aynu sidaan u dhaanno oo intii la kari karo, macne ahaan iyo naxwe ahaanba, aynu u ilaalinno?. Sow inagama mudna xeerarkiisa haddaba aynu wax ka naqaan in aynu dhawrno, si aanay da'yartu u qaayibin gefaf-afeed haddaba laga sixi karo?. Sow inagma mudna in aynu ilaalinno dhismaha hagaagsan ee weedhiisa, si,

berri-ka-maalin, cilmi-baareyaasha afafku aanay ugu wareerin, waxna ugu wareerin?

Runtii, intaasba afkeenu wuu inaga mudan yahay, haddii aynu yeeli weynona, waxaa suuraggal ah innaga oo weli nool inaynu ifka ku aragno Soomaali magaca wada sheeganaysa oo af qura inay ku hadlayso ku andacoonaysa, haddana aan is'afgaranayn! Haddaynu afsoomaaliga isku ladno, waxaan ka cabsi-qabaa waayeelkeenna maanta nooli inaynu noqonno kuwa ugu dambeeya oo iyaga oo garanaaya dhegeysta, dhadhansada, kuna raaxaysta gabayadii quruxda badnaa ee Raage Ugaas, Faarax-Afcad, Saahid Qamaan, Sayid Maxamad Cabdille, Faarax Nuur, Cali-Dhuux, Cabdi Xirsi, Qamaan Bulxan, Aadan-Gurey, Salaan Carrabey, Ismaaciil Mire, Maxamad Aadan-Caws, Cali Xuseen, Cali Afyare iyo tobannaankii la ayniga ah ee, innaga Soomaalida ahi, aynu ku dhaadanno!

* * *

Intaan, haddaba, ararta halkaas ku hojiyo maan kolka hoos u daaddego oo danta maan u dhaadhaco. Waa sidaaase, sannadihii ugu dambeeyey ayaan waxa aan kansho u helay inaan dhegeysto qalabka warfaafinta ee afsoomaaliga wax ku baahiya iyo inaan akhristo qaar ka mid ah wargeysyada gudaha dalka iyo dibeddiisaba afkaas lagaga soo saaro. Sidoo kale, waxaa maalin-maalin ii suuraggasha in aan isha mariyo baraha *Internetka* oo inta mindhaa 4.5 loo qaybsaday uu tol wali oo Soomaaliyeed mid ku yeeshay! Markaas baan kolba weedho sibaaban ku hakadaa. Kolba asaaskii naxwaha afka oo dhaawacan ayaan ka dul-dhaacaa. Kolba erayo si sirgaxan loogu adeeganaayo ayaan dul-joogsadaa. Kolba qaar macnihii ay lahaayeen mid aan ahayn loo xanbaarshey ayaan ku dhaygagaa, lana yaabaa.

Saan qalin iyo xaashi cad baan agagaarkayga ka haabhaabtaa; anigoo maaggan inaan uruuriyo oo aan meel qura ku soo koobo gefaf-afeedka dharaar noolba dhegahayga ku soo dhaca ama ay indhahaygu qabtaan. Mase wax xaashi iyo laba lagu soo koobi karoba ka badan, kana baaxad weyn!

Si kastaba ha ahaatee, kol dambe ayaan waxaan go'aansaday bal qaar gefafkaas ka mid ah inaan dadweynaha u soo bandhigo, isla markaasna warfaafinta maanta jirta aan ku baraarujiiyo baahida loo qabo inaynu u fiirsanno hagaagsanaanta erayada afka iyo weedhaha aynu adeegsanayno. Marnaba ku andacoon maayo in aan ku jiro afsoomaaliga dadka dadka ugu badsha iyo kuwa xiga toona, waxaanse ka mid ahay inta wax ku qorta oo dhadhansiga murtidiisa iyo macaansiga maansadiisa ay naftu ku soo gasho; sababtaas ayaana, malaha, ugu weyn sababihii iigu wacnaa hawshan aan sina fudaydka ugu tilmaannayn inaan gorodda la galo.

A. Erayada

Sidaan, haddaba, meel hore ku soo sheegay, gefafka maalin walba afka ku soo kordhayaa tiro ma laha, waxaana ka mid ah qaamuuska ama erayada oo si silloon loo adeegsado, naxwaha iyo xeerarkiisa oo aan loo meelo-deyin, eraybixin afafka shisheeye inooga timid oo si aan hagaagsanayn loo adeegsado ama, iyada oo aan loo baahnayn, lagu beddalanaayo tii aynu horayba u qaayibney ee waa hore afkeenna ka midka noqotay.

Gefafka naxwaha, kuwa eraybixinta iyo arrimaha kaleba ha ii dambeeyeene, waxaan u horraysiinayaa erayada qaarkood iyo sida qaldan ee warfaafinta Soomaalidu ay waayadan u hirgeliyey amaba, indhaheenna oo shan ah, ay eeggaba u hirgelineyso. Markaas ka dibna waxaan ku xijin doonaa inaan sheego macnaha dhabta ah ee ay erayadaasi afsoomaaliga ku lahaayeen, ka hor kooxaha warfaafinta qaar ka mid ahi intii aanay dhalan-rogin, sidaasna aanay dad badan ku marin-habaabin.

1. Beel': Waxaan maqlaa weriyayaasha qaarkood oo oranaaya: "Laba beelood ayaa meel hebla' shalay dagaal ku dhex-maray'. Maalmo ka dib ayaan haddana maqlaa, iyada oo uu weriyuhu leeyahay: "Laba beelood oo walaalo ah ayaa ku diriray meel hebla', isaga oo mooggaan u jeeda kuwii maalintii hore dagaallamay lafo ka mid ah!

Dhaqanka reer-miyigeenna markaynu u noqonno, eraygaan 'beel' waxa uu tilmaamaa qoysas toban ilaa dhawr iyo toban gaari kara oo, badanaa, laba ama saddex oday kala tirsada ama, haddii si kale loo yiraahdo, abtirsiino aad u dhow wadaaga. Aalaaba, seben hagaagey oo barwaaqo ah ayay *beeshu* abuurantaa, marmarna dano ka dhexeeya ayay u dersaan sida 'dugsi-quraan' ay wada oogtaan xilli macallin wanaagsan la helay. Waxay kaloo beeshu abuurantaa xilliyada colaadda; markaas oo loo baahan yahay in la iska kaashado u-jilib-dhigidda col laga baqaayo oo, wadar ahaan in la isaga celiyo mooyee, aan qoys-qoys loogu birdhigi karin. Erayada kale ee erayga 'beel' la macnaha ahi waa 'duddo' iyo 'qayro'; in kastoo Soomaalida reer-magaalka ahi aanay midkoodna isticmaalkiisa ku soo dhowaan.

Dhawr-iyto-tobankii sano ee aynu soo dhaafnay, erayga 'beel' wuxuu ka mid ahaa kuwa, haddii tiro-koob la sameeyo, ugu badnaan lahaa xagga ku-adeegashada. Waa eray maalin walba ku soo noqnoqda afka ragga siyaasadda ku xoogsada iyo weriyayaasha warfaafinta ay Soomaalidu dhegeysato. Mar walbaba inta eraygaas adeegsataaba waxay seejiyaan, asal ahaan, macnihii uu u lahaa, waxayna ugu adeegtaan fikrad ka ballaaran oo aanu buuxin karin. 'Qabiil hebel' ama 'tol hebel' halkii ay ka oran lahaayeen, waxay oran, 'beel hebla.'. Kolkaas baan is'iraahdaa: 'Waa yaabe, tol dhan ama qabiil idil oo dadka wada sheegtaa ay labataan oday iyo ka badan isugu tagaani, sidee buu beel ku noqon karaa?

Tol oo ah, afsoomaali ahaan, erayga macnahaan ku habbooni wuu sii kala qaybsamaa oo wuxuu u sii kala baxaa lafo iyo jilibbo, beelise ma yeelan karto oo jilib iyo lafa iyada ayaaba ka hoosaysa, kana tiro yar. Hadday sidaas tahayna, suuraggal ma aha tolweynihii oo idil inaynu 'beel' ku sheegno, isla markaas lafihii uu u kala baxaayeyna aynu 'beel ugu yeerno!

Dir iyo Daarood, Hawiye iyo Raxanweyn iyo magacyada kale ee la midka ah, sidee baynu 'beelo' ugu sheegi karaynaa, iyaga iyo, sidoo kale, qaybaha ay u sii kala baxaanba? Kolley, sheegsheeggooda iyo wax-ku-qaybsigooda haddii aan la deyn karayn, maxaa diidaaya waxa ay dhabtii yihiin oo 'qabiil' ama 'tol' ah inaynu ku sheegno, qaybaha ay u sii kala baxaanna aynu jilibbo iyo lafo ku tilmaanno, sidaasna gefkaas dhowaan-soo-galka ah aynu afka uga saxno?!. Jawaabtu, siday aniga ila tahay, waa waxba. Mase la yeeli?

2. Magac-darid; Waxaan maqlaa weriyeyaasha qaarkood oo oranaaya: 'Haddana, waa xubintii aannu ugu *magac-darnay* sidaas iyo sidaas'. Ama iidheh dhegeysatada loola jeedo, laguna leeyahay: "Xaafad hebla' waxaa laga furay makhaayad aad u wanaagsan; taas oo loogu *magac-daray* Kaah!". Erayga *magac-daridduna* meelahaas oo kale ma galo, kumana habboona.

Hiddaha Soomaalida waxaa ka mid ah kolka reerka wiil u dhasho in inta xoolaha neef laga qasho goobtaas loogu walqalo oo loogu magac-bixiyo. Badanaa, magc-bixinta inanka waxaa iska leh aabbihiis, in kastoo kolkolka qaarkoodna laga talo-geliyo xigtada kale ee habeenkaas ama maalintaas goobjoogga ah.

Marar badan ayaa waxaa dhacda in loo dooro magaca uu leeyahay ku' ka mid ah inanka dhashay adeerradiis, abtiyaashiis amaba labadiisa awoowe mid ahaan. Sidoo kale, waxaa loo bixin jirey magac dheer oo loo yaqaan nin geesi ah ama shiikh ah ama awliyo ah ama si kaleba bulshada dhexdeeda uga tilmaaman amaba, markaas ka hor, uga tilmaannaan jirey . Taasna waxaa laga fishaa wanaag iyo, timaaddada, inuu canuggaasi la anshi noqdo abtiga, adeerka amaba nin-karmeedka kale ee loogu magac-daray.

Iyada oo kooban, macnaha eraygu waa qof dhashay oo loo bixiyey qof kale oo la yaqaani magac uu horay u lahaa. Tusaale ahaan, nin Cabulqaadir la yiraahdo ayaa waxaa la weyddiin jirey: "Hebelow, maxaa Cabdulqaadir laguugu bixiyey?". Markaas buu ku jawaabi jirey: "Aabbahay baa Dariiqada Qaaddiriyada ahaayoo, wuxuu iigu magac-daray Shiikh Cabdulqaadir Al-Jiilaani". Ama haweeney gabar dhashay ayaa la weyddiin jirey: 'Heblaay, maxaad gabadhaada Xaawo ugu bixisay. Markaas bay oran jirtey: "Waxaan ugu magac-daray, Allaha u naxariistee, Xaawo-Taako; bal inay qof dalkeeda jecel noqoto". Tu' kale ayaa la weyddiin jirey: "Heblaay, maxaad adigu inantaada Faadumo ugu bixisay?". Markaas bay iyana oran jirtey: "Waxaan ugu magac-daray Faadumo Rasuul, bal inay diinta ku fiicnaato".

Sidoo kale, adeegsiga eraygu markuu hagaagsan yahay waa marka aad tiraahdo: 'Hoteelkii Jubba ee Xamar waa ku oolli jirey waxaa loogu magac-daray webiga Jubba ee Koofurta Soomaaliya mara, Hoteel Taleexna waxaa loogu magac-daray xaruntii dooxada Nugaaleed ku tiil ee uu lahaa halgamaagii weynaa; Sayid Maxamad Cabdille Xasan.

Hase ahaatee, weriyeyaasha qaarkood sidaas si aan ahayn ayay *magac-daridda* ugu adeegtaan. Waxaan maqlaa qaarkood oo oranaaya: "Waxaa heestaan naga soo codsaday hebel iyo hebla', waxayna u dirayaan, uguna hanbalyaynayaan hebel iyo hebla' oo meel hebla' uu wiil ugu dhashay; kaas oo Liibaan loogu *magac-daray!*". Waxay u jeedaan inay yiraahdaan: "...kaas oo Liibaan loo bixiyey" ama loogu 'walqalay', maxaa yeelay, sida muuqata, ma jirto, haddii ay jirtona nalooma sheegin cid kale oo Liibaan la yiraahdo, inanka yarna loogu magac-daray.

Waxaa iyaduna sidaas oo kale gef u ah, dhowaanna aan idaacadaha qaarkood ka dhegeystey, iyada oo la leeyahay: "Isreebreebka hore ee doorashada madaxtooyada Maraykanka waxaa ugu muhiimsan maalinta loogu *magac-daray* 'Super Tuesday'; taas oo sannakaan ku aaddan 5ta Febraayo oo saaddambe ku beegan". Kaasina, waa hadal aan hadda hagaagsanayn, asii hagaagsanaan lahaa haddii ay meel uun ka jiri lahayd maalin kale oo iyaduna magacaas leh, Maraykankuna ay toodaan ugu magac-dareen.

Magac-daridda macnaha dhabta ah ee ay leedahay waxaad ka heli karaysaa hees jacayl ah oo ay Soomaalidu aad u taqaan, sheeko dhab ahaan u dhacday darteedna ku soo baxday. Aniguse goobjoog ma ahayne, kuwii ahaa qaarkood ayaa ii warramay oo igu yiri: "Allaha u naxariistee, hal'abuurkii caanka ahaa ee la oran jirey Maxamad Cali Kaariye ayaa beri waxaa haleelay dareenka jacaylka; kaas oo dhismaha jirkiisa iyo maankiisaba si degdeg ah ugu fiday. Gabadha uu jacaylkeedu wareemay waxaa, Eebbe qaddarey, inay ahaato mid uu magac iyo muuqba u garanaayo oo ay hay'ad qura ka wada xoogsadaan, sidaas darteedna toddobaadka intiisa badan ay, weji ahaan, kulmaan, laabuhu yeelkoodel!

Ha yeeshee, la-kulankaasi fannaanka waxba uma lilleyn jirin oo ololka dabka kalgacalka kama uu qaboojin jirin. Maxaa yeelay, wax ugu wacnaaba, gabadhu iyada oo og qalbiga Maxamad Cali inuu xaggeeda soo jiro ayay haddana ismoogeysiisaa. Iyada oo og inay iyadu maankii ka xadday ayay haddana ka sii jeensataa. Inna uma baxdo, uma jillicdo, umana jixinjixdo. Fannaankuna, in kastoo maalmihii dambe inuu is'illowsiiyo uu ku dedaali jirey, haddana ma samro oo inay u gacan-haadiso kama quusto!

Beri dambe, isaga oo aqal gudahiis rag dhawr ah kula caweynaaya, qudhiisuna uu markaas sheekada wado ayaa si lamafilaan ah waxaa dhegihiisa ugu soo dhacay gabdhaha xaafadda middood oo tu' kale u yeeraysa. Waxay ugu yeertay isla magacii ay lahayd inantii uu isagu jeclaa ee, markuu hanan waayey, inuu ishalmaansiyo uu ku tashaday. 'Heblaay!' markay tiri ayuu qarracmi gaarey.

Tummaati aanu aqoon meel ay uga timid ayuu dhinacyada oogadiisa ka dareemay. Markaas baa miyirkiiba ugu dambaysey. Wuxuu kala garan waayey magaca uu maqlay in isaga loola jeedo iyo in kale. Kolkaas buu fadhigii halhaleel uga kacay, isaga oo aan dan iyo daarad ka gelin raggii uu haasaawinaayey iyo sheekadii uu u wadey toona. Dheg la qabto isaga oo aan lahayn ayuu qolkii dibedda uga boodey.

Waxba isaga oo ay u kala caddaan la' yihiin, irriddana liqdaaran ayuu nabarkii labaadna ku dhacay. Wuxuu maqlay gabadhii loo yeeray oo tii u yeedhay ku leh: "Hee, hebla!". Mase codku waa codkeedii oo aan car isku rogin! Waa tii uu jeclaa ee u soo loodsami weydey codkeedii! Suu waa isdabammaray oo sarejoogga ka dhici gaarey. Markaas buu afarta garjaho indhaha midba mar u diray. Wuxuu isleeyahay: 'Qofka loo yeeray ee aad codkeeda maqashay tu' kale ma ahee, waa iyadii oo galabta ku soo raadisey oo intay, malaha, kaa naxday goosatay inay sida kuu dhaanto!'. Mar kale ayuu afarta garjaho indhaha u kala diray. Jaanqaad meel dhow ah ayuu dareemay, kolkaas buu dhanka midige ku xasilay. Mase waa gabar; gabadhii magaceeda iyo codkeeda uu maqlay ee uu agagaarka ka jeedaalinaayey. Hase ahaatee, in kastoo xagga muuqa iyo midabkaba aan tiisii laga aqoon, haddana tiisii ma ahayn! Markaas baa nabarkii saddexaad lagu soo tuuray!

Saddexdaas nabar markay isu raacday ayay laabtii oloshey. Sheeko uu islahaa, 'way kaa dhammaatay' ayay maankiisa ku soo celiyeen. Sidi wax la arooriyey ayuu u ekaaday. Raggii iyo aqalkii dib uguma laabane, horay buu isaga dhaqaaqay, isaga oo ay murugo buuxisey. Waa hal'abuurkii weynaaye, hees buu halkii ka bilaabay; heesta sidiisa caanka u noqotay ee Xasan Aadan uu qaado. Waa heesta uu ku bilaabay:

Kuwa loogu magac-daraye
Muuqa aan la kala garan
Caku mohashadoodee
Heesaha macaan iyo
Muusiggiyo codkay diley!;

Dhegaha aan ka maalee
Markii aan illaawoba
Wax i soo mir-kiciyoon
Maqlo waayi maayee;

Ma hayoo, mana sugaayoo
limana maqnee;
Maareeyoo sidee buu cishqigu
Maskaxdiyo qalbiga
Uga miirmayaa!

Erayga 'magac-dariddu' marka uu hagaagsan yahay waa tabtaas uu fannaanku heesta ku bilaabay. Sidaas darteed, waxaa habboon inaynu kala baranno

magacbixinta iyo magacdaridda, dabadeedna innaga oo kala naqaan aynu eray walba halka uu ku habboon yahay u adeegsanno.

3. Afhayeen: Waxaan maqlaa weriyeyaasha qaarkood oo oranaaya: “Afhayeen u hadlay *dawlad hebla’* ama *Wasaarad hebla’* ayaa *meel hebla’* arrinta caynkaas iyo caynkaas ah ka sheegay”. Taasina waa gef xagga afka ah oo bulshada dhexdeeda siduu ugu shaacay markaan u fiirsanno ay adag tahay inaynu iska saxno!

Yeelkeede, taariikhda afka markaynu dib ugu noqonno, maxay Soomaalidu eraygaan u tiqiin? Waxay u tiqiin ninkooda afafka qalaad wax ka yaqaan oo isaga af-celin jirey iyaga iyo shisheeyihii dalkeeda gumeysan jirey ama ganacsiga ku soo gaari jirey amaba doolka ku imaan jirey. Wuxuu la mid yahay erayada ‘afceliye’, afnaqe iyo ‘turjubaan’ oo isagu ah eray Carabiga ka soo jeeda, Soomaaliduna ay sida uu yahay ugu adeegsato.

Inuu macnahaas lahaana waxaa laga heli karaa meerisyada maansadeennii hore qaarkeed. Dhammaadkii qarnigii 19d ama bilowga kii 20d ayaa laba qolo oo Soomaali ahi waxay ku heshiiyeen inay isgaashaanbuursadaan oo col iyo abaarba ay iska kaashadaan; iyaga oo, sida la yiri, u dan lahaa qolo kale oo labaduba ay cadowgooda u arkayeen. Sida aynu hadda wax yeelno, heshiiskaasi markii uu dhacay inta qodobbadiisa xaashiyo lagu qoray laguma kala saxiixan, odayadii goobta isugu yimid oo idilina suulka ma ay saarin. Waxaase loo daayey oo laba geeraar labadoodii qolo ugu kala saxiixay laba nin oo aad u gabyi ogaa, labadaas qolo ergadoodana ku kala jirey; waa Faarax Nuur iyo Maxamad Bulxan oo ‘Maxamad-Cawar’ loo yiqiine. Waxaa ku horreeyey Faarax Nuur oo goobtii ka tiriyey geeraar gole-ka-fuul ah oo 16 qodob ah; waa geeraarka gadaalkii ‘Axdii’ loo bixiyey; kaas oo uu ku faahfaahiyey, maalintaas ka dib, xiriirka labada qolo sida loo baahan yahay inuu ahaado. Markaas buu Maxamad Bulxanna isla markiiba wuxuu kaga jawaabey geeraar isna gole-ka-fuul ah oo 16 qodob ka kooban; geeraar kii Faarax la xaraf ah, uuna ku oggolaanayo codsi iyo talooyin wixii uu Faarax iyaga u soo jeediyey.

Si kastaba ha ahaatee, qodobbadii Faarax Nuur ayaa waxaa ku jirey mid uu qolada Maxamad-Cawar kaga codsanaayey inay ka kaalmeeyaan dhinaca afhayeenada Maamulkii Ingiriiska oo qoladiisu aanay waxba ku lahayn, qolada Maxamadse ay ku tiro badnaayeen. Had iyo jeerna, Xafiisyada Gumeysiga markii dacwo loo tago, waxaa ku xoog badnaan jirey oo ay gartu u go’i jirtey kolba ninkii ama dhinacii afhayeenka laaluusha amaba, xigaalo ay yihiin awgeed, uu ugu eexdo. Qodobkaas isaga ah wuxuu Faarax Nuur ku yiri:

Ninka gaalka ag-joogee
Afhayeen la yidhaaho
Ninkaan wiil ka ilaashiyo
Ilmaadeer ku lahayn
Waa la iibsanyaaye
Haddaydaan naga eegin

Adinkaa axdigii iyo
Aamminikiiba furaaya!

Maanta oo la joogo, macnahaas ay Soomaalidu u tiqiin eraygaas waa lumiyey ama waa la gefsiyey, waxayna warbaahintu siisay macne kale oo hor leh, dadka intiisa badanna loo baray. Waxaa hadda erayga *afhayeen* lagu magacaabaa kolba qofka loo igmado inuu ku hadlo magaca dawlad, hay'ad ama urur uu ka tirsan yahay; isla qofkaas oo af-ingiriiskana loo yaqaan *spokesman* ama *spokesperson*. Aniga oo og in la iga yeeli doonaa in aysan fududayn ayaan haddana waxaan is'iraahdaa: Erayga *afhayeen* inta aynu u deyno macnihii uu horay u lahaa, maxaa, afkeennu waaba hodone, inoo diidaaya inaynu niraahno: "Nin u hadlay dawladda Ingiriiska ayaa maanta ku dhawaaqay xeer cusub oo argaggixisada lagula dagaallamaayo". Ama in aynu niraahno: 'U-hadlaha xukuumadda Ruushanka ayaa ku dhawaaqay in aanay oggolaan doonin faraggelinta Reer-Galbeedku ay arrimahooda gudaha ku hayaan'. Bal inta dadka wax u sheegtaa taladaas daymo ha u yeelato.

4. Abwaan: Waxaan maqlaa weriyeyaasha qaarkood oo oranaaya: "Gabaygaas aad maqasheen waxaa inoo marinaayey abwaan hebel-hebel". Ama mid kale oo oranaaya: "Heestaas waxaa miraheeda tirshey abwaan hebel-hebel". Waase ku-kakabise, eraygu meelahaas ma galo, kumana habboona.

Abwaan waa eray ay Soomaalidu ku magacawdo ninka aqoonta dheeraadka ah u leh dhaqanka iyo ilbaxa qolada iyo degmada uu u dhashay iyo, sidaas oo kale, qolyaha kale ee la deriska ah. Waa nin si wacan u yaqaan xeerarka iyo axdiyada u dhexeeya tolka uu isagu ku abtirsado iyo kuwa kale ee ay ood-wadaagta yihiin. Sidaas awgeedna, waa nin aan kolnaba looga maarmin geedka garranka iyo wada-xaajoodka. Guud ahaan, waa nin si ballaaran ugu dhuun-daloola hiddaha iyo taariikhda bulshadiisa, si wanaagsan oo loo jeelona uga sheekayn kara; isaga oo aan buugag ka akhrisan, waxbarasho rasmi ahna aan abwaanimadiisa ku helin.

Qaamuuska afsoomaaliga ee Yaasiin Cismaan sida ku xusan, erayada la midka ah amaba ugu dhowi waa 'waayo'arag', 'waxyaqaan' iyo 'buuni.'. Macnahaas isaga oo maanka ku haya ayuu guddi-hoosaadkii Guddiga Afsoomaaliga eraybixinta ugu qaybsanaa wuxuu 1972kii eraygaas u bixiyey buugga weyn ee lagu ururiyo laamaha kasmooyinka kala kaanka ah ee uu aadanuhu gaarey, Reer-Galbeedkuna ay ugu yeeraan erayga ah 'encyclopedia.'

Labadaas macne midkoodna maanta Soomalidu eraygaas uma taqaan, wuxuuna yeeshay macne kale oo ay warbaahintu u hirgelisey; kaas oo ah gabyaa, riwaayad-curiye amaba hal'abuurka heesaha tirsha. Waxaan maqlaa iyada oo la leeyahay: "Abwaanka da'da yar", markaas baa hoosta iska iraaahdaa: "Alla abwaannimo iyo da'yaraani kala fogaa!"

In kastoo ay hal'abuurkiisa u wanaagsan tahay, haddana gabyaaga lagama rabo inuu waayo'arag noqdo ama uu aad u yaqaan taariikhda degaankiisa iyo dadyowga ku nool. Isaga oo da' yar oo aan guryahooda dhaafin ayuu gabyaa wanaagsan noqon karaa. Isaga oo aan garaad badan lagu kuunyin oo dadkiisa isaga dhex-jira ayuu noqon karaa maansoyahan afkiisa la wada dhawro. Taariikhda dalkiisa iyo dadyowga la deriska ah isaga oo aan wax badan ka aqoon ayuu hal'abuur wacan ku tilmaannaan karaa.

Haddaba, 'gabyaannimo' waa hibo gaar ah oo abwaanimada ka duwan, in kastoo mararka qaarkood ay suuraggal tahay in laga kor-dhaco qof labada tilmaamoodba isku darsaday oo kol qura abwaan iyo gabyaaba wada ah! Si kastaba ha noqotee, qofka maansada tiriya gabyaa ama geeraarshe ayay Soomaalidu u bixisay, afka ayayna dhaawici kartaa, isaga oo aan ahayn, haddii aynu abwaan ku sheegno.

5. Degaan: Waxaan maqlaa weriyeyaasha qaarkood oo oranaaya: "Bacda lagu adeegtaayi *deegaanka* ayay u daran tahay". Ama mid kale oo ku warramaaya: "Wasiirka *deegaanka* ayaa sheegay in loo baahan yahay in dunidu si wadajir ah ay daryeelka *deegaanka* isaga xil-saarto". Ama mid saddexaad oo ku soo war-tebinaaya: "Waxaa *Deegaanka* xeebta Ayl lagu haystaa markab dal hebel laga leeyahay oo la soo afdubay".

Marka hore, erayga ay weriyeyaashu u jeedaani waa *degaan* ee *deegaan* ma aha. Waxaa laga soo dhanbashay erayga 'degid', wuxuuna ku isir yahay '*degmo*' iyo '*degganaan*' oo ah erayo kale oo lagu tilmaamo meesha ama geyiga lagu nool yahay. Wuxuu ku jiraa qaar tiro badan oo intii la qoray uu adeegsigoodu afsoomaaliga ku soo batay; iyaga oo, si kutalaggal ah, macne cusub loogu xanbaariyey.

Waxaa loo bixiyey, wadar ahaan, waxyaalaha nolosha dadka lamahuraanka u ah ee, mar walba, in la ilaaliyo la isku tirtirsiiyo sida dhulka aynu ku dul-dhaqan nahay; hadday tahay baddiisa ama birrigiisa ama hawadiisa ama noolaha kale ee biyihiiisa iyo bannaankiisaba aadanaha ku weheliya. Sidaas marka uu eraygu u qoran yahay oo shaqalkiisa hore (e) uu gaaban yahay ayuu macnahaas qaadi karaa, una dhigmi karaa erayga qalaad ee la feer-dhigay; waa erayga ah 'environment'.

Ha yeeshee, waxa aan jirini waa erayga *deegaan (-ka)* oo isaga oo lab ay haatan laamaha warfaafintu ay macnahaas ugu adeegtaan, aadna mooddo inuu dadweynuhuna kaga dayday, sidaasna, indhahayaga oo shan ah, uu ku hirgelaayo.

Dhanka kale, waxaa jira erayga *deegaan (-ta)* oo ah magac dheddig, lehna laba shaqal oo dheerdheer. Waa eray ay Soomaalidu u taqaan *dhirta* faraha badan ee ka baxda dhulka sida wacan uu roobku ugu da'o, sida aadka ahna u doogta. Eraygaas dambe iyo macnaha uu xanbaarsan yahay ayuu u jeeday gabyaagii

Reer-Hawdeedka ahaa ee la oran jirey Cabdillaahi Muuse; kolkii uu gabayadiisa midkood ku darsaday:

“

Deegaan sideed kaaga dhereg doobka reeruhuye
Dar kaloo haween lihi wax badan kaa dukaansade e!”

Sidaas darteed, erayga ‘degaan’ oo ah magac lab, shaqalkiisa horena gaaban yahay ayaa jiree, *deegaan* (*..ka*) oo magac lab ah, labadiisa shaqalbana dheer dheer yihiini ma aha eray sax ah, kumana habboona fikradda aynu rabno inuu inoo xanbaaro. Waxaase jira erayga *deegaan* (*..ta*) oo ah magac dhedig, markii qodob-dheddigeedka la raaciyona noqonaaya: *Deegaanta*, waxaana loo baahan yahay in sidaas loo kala qeexo; dhigid iyo dhihid labadaba.

6. Baaq: Waxaan maqlaa weriyeyaasha qaarkood oo oranaaya: “Hadal uu shalay meel fagaare ah ka jeediyey, waxa hebel oo madax ahi uu dadweynaha ugu baaqay inay nabadda ilaaliyaan”. Ama mid kale oo ku warramaaya: “Wasiirku wuxuu beerreyda gobol hebel ugu baaqay in xilliga soo aaddan ay waxsoosaarkooda kordhiyaan”. Waase ku-kakabise, baaqu halkaas oo kale kuma habboona, mana galo.

Baaq waxa uu afsoomaaliga ku yahay eray ama erayo ama dhaqdhaqaaq wax la isku dareensiyo oo dad is’ogi ay, si dadban, wax isugu sheegaan. Oorida iyo saygeeda ayaa *baaq* wax isugu sheegi kara; iyada oo martida u joogtaayi aanay dareemin. Hooyada ayaa carruurteeda qaarkood wax ku ogeysiisa *baaq* ay isla og yihiin. Barbaarka iyo gashaantida isxodxodta ayaa waxay ku heshiidaan *baaq* ay farriimaha gaaggaaban isugu gudbiyaan, dadka kalese, in kastoo ay iyaga meel la joogaan, aanu waxba ka ogaan karin.

Colka Soomaalidii Reer-miyiga ahayd kolka uu duulaayo waxa uu samaysan jirey *baaq* ay isku og yihiin oo, inta aan la dhaqaaqin, ay wada qaybi jireen; kaas oo markii ay habeen noqoto oo la isdhex-galo lagu baajin jirey, rag isku jaal ah oo aan isgaranayni inay isdilaan; kamma’ ahaan.

Bal aan tusaaleeyee; niman duullaan ah ayaa waxay ku soo dhowaanayaan reerihii ay geli lahaayeen. Aqalladoodii iyo xoolahoodii kolkay u muuqdaan ayuu ammaanduuluhu colka hojinayaa, si uu ugu yeelo *baaq* ay, hadhow, isku afgartaan. Ugu dambaysta ayay ku ballamayaan *baaq* ka kooban labada eray ee kala ah *Yaasiin* iyo *Tabaarak*; kuwaas oo laba iyaga ka mid ahi markii ay kala shakido ay isweydaarsan doonaan, sidaasna ay isku garan doonaan, kuna kala bedbaadi doonaan.

Iyada oo mugdi ah oo dagaaalkiina weli socdo ama intuu dhammaaday qolo la baqe-eryaayo ayay laba iska hor-imaanaysaa, ku’ walibana hubkiisii oo u diyaar ah ayuu gacanta ku haystaa. Ha yeeshee, in kastoo ninba uu midka kale dhab uga digtoon yahay, haddana labada midina ma rabo ina’adeerkiis la soo duuley ama jaallihis inuu, si kamma’ ah, ku dilo. Kolkaas buu midkood la soo boodaa:

“Yaasiin!”. Midka kalena, haddii uu la qolo yahay, intuu baaqa qaybtiisii kale xusuusto ayuu oranayaa: “Tabaarak!”. Markaas ayay israacaan oo halka colkoodii jiro ay wadajir u beegaan. Haddiise uu jawaabta saxda ah garan waayo, kii hore waxaa u caddaanaysa ninka hor-taagani inuu ka mid yahay cadowgii ay xiirexiiraha ahaayeen, markaas oo uu waranka kala hormari jirey ama, haddii laga gacan fudud yahay, isaga lagala hormari jirey.

Sida uu yahay waxa eraygaas u adeegsan jirey Xooggii Dalka Soomaaliyeed oo lahaa ciidan gaar ah, lana oran jirey; ‘*Baaqa Qarsoon*’; in kastoo aan loo baahnayn erayga ‘qarsoon’, haddiiba baaq la soo qaaday. Waxa uu Xooggu eraygaas ula jeedey waxa Reer-Galbeedku ay ‘code’ka ugu yeeraan ee ay ciidamadu dhanbaallada isugu gudbiyaan; iyaga oo adeegsanaaya xarfo iyo astaamo ay mar hore, si gaar ah, ugu heshiiyeen.

Maanta, badanaa dhallinyarada warfaafinta wax ka tebisaa erayga ‘baaq’ uma adeegsadaan macnahaas aan soo sheegnay ee uu afkeenna ku leeyahay. Waxaa la maqlaa war-tebiye meel ka soo warramaaya oo leh: “Meel hebba’ shir lagu qabtay waxaa ka soo qayb-galay hebel oo madax ah, wuxuuna dadkii goobtaas isugu yimid ugu *baaqay* inay iskaashdaan!”. Allaha ka cafiyee, sida inoo wada muuqata, meeshaan ‘baaq’ kuma jiro, maxaa yeelay ma jiraan wax la qarinaayey oo ka dhexeeya amaba ay si gaar ah isugu ogaayeen ninka madaxda ah iyo dadkii shirka ka soo qayb-galay ee uu la hadlaayey. Waxaa war-tebiyaha ku habboonayd inuu yiraahdo: “Dadkii uu la hadlaayey waxa uu hebel kula taliyey ama uu ku guubaabiyey ama uu ku baraarujiyey ama uu ku tirtirsiiyey inay iskaashadaan”.

7. Tibaax: Waxaan maqlaa weriyeyaasha qaarkood oo oranaaya: “Madaxweyne hebel ama Ra’iisulwasaare hebel oo la hadlaayey Golaha Wasaaradda ayaa tibaaxay inay dardar-geliyaan hawlaha u yaal”. Ama mid kale oo oranaaya: “Xoghayaha Guud ee Qarammada Midoobey waxa uu tibaaxay in dunidu si wadajir ah ay wax uga qabato kulaylka cimilada oo maalinba maalinta ka dambaysa ka soo daraya”. Maxay, haddaba, tibaaxi tahay?

Waa eray lagu tilmaamo war la maqlay ama la sheegay, hase ahaatee aan cid hubtaayi jirin. Malahaygana, erayga ugu dhowi waa male. Waxaad oran kartaa: “Waxaan tibaax ku helay lacagtii aan waayey inuu hebel hayo, hebelna uu la og yahay.”. Waa war aad maqashay, hase ahaatee aan ahayn mid sugan oo, adiga oo cuskanaaya, aad xoolahaagii ku doonan karayso, hebelna aad ugu sheegan karayso.

Tusaale ahaan, laba nin oo reer-miyi ah, meelna wada dega ayaa midkood wuxuu kan kale weyddiin jirey bal inuu helay tulud geel ah oo uu ogaa inay ka maqnayd, kan lihina uu ceel iyo carshinba ka baadiggoobi jirey. Markaas buu ku jawaabi jirey: “Weli gacantayda wax kuma jiraan, tibaax baanse helay”.

Waxaa la oran karaa: “Wasiirka Maaliyadda ee dal hebel wuxuu sheegay in warbixinnada uu helayaa ay tibaaxayaan in sicirka saliiddu uu aad u kordhi doono haddii liraan la weeraro.’. Weedhaas waxaa laga garanayaa in warbixinnada Wasiirka la soo gaarsiiyey ay cuskan yihiin warar aan markaas sugnayn oo runtooda la gaari doono markii liraan la weeraro oo keliya, waana macnaha dhabta ah ee uu eraygu leeyahay.

8. Booqasho: Waxaan maqlaa weriyeyaasha qaarkood oo oranaaya: “Guddoomiyaha baarlamaanka liraan ayaa maanta booqasho ku tegey dalka Masar”. Maalin kalena waxaan maqlay ku’ kale oo ku warramaaya: “Koox isugu jirta ururrada aan dawliga ahayn oo samafalka ka shaqeeya ayaa saaka waxay tagtay ceelasha biyaha; halkaas oo ay kooxdu ku booqatay kumaankun qof oo ka soo qaxay dagaallada Xamar ka socda”.

Erayga *booqasho* sidaas iyo siyaalo la too ah ayay haatan warfaafintu u adeegsataa, wuxuuna u eg yahay wax sidaas ku hirgalay. Hase ahaatee, waa adeegsi ay wax si ka yihiin. Waa adeegsi aan waafaqsanayn macnihii hore ee uu eraygu lahaa.

In kastoo ay dad yari xusuusan yihiin, haddana erayga *booqasho* wuxuu afsoomaaliga ku yahay socod gaaban oo loogu tago qof xanuunsan; kaas oo xigto, wadey iyo aqoonniba noqon kara.

Waa eray waayo hore aynu marin-habaabinney oo macnihiisii asalka ahaa laga afduubay. Anse ilaa hadda ma qaayibin, markii aan maqlana waxaa maankayga ku soo dhaca bugto iyo qof bushi la il-daran oo la kor-dhooban yahay, dadkii soo booqdayna ay u ducaynayaan. Runtii, weli waan yaabaa marka aan idaacadaha ka maqlo iyada oo la leeyahay: “Madaxweyne hebel wuxuu *booqasho* ku tegey dal hebel”, sidii iyada oo uu dalkaasi jirran yahay, dadkiisuna ay isbitaallada ku wada jiraan!.

Waxaase jirta hees uu eraygu sida hagaagsan ugu jiro oo Basra uu magaceedu ahaa. Mireaheeda waxaa iska lahaa hal’abuurka la yiraahdo Cabdulqaadir Xuseen oo ‘Fuushane’ lagu naanayso, waxaana qaadi jirey heesaaga caanka ah; Xasan Diiriye. Meeriskeeda koowaad ayaa wuxuu ahaa:

**Berigii baa
Caashaqan baas
La igu beeree;
Baahaan qabaayoo
Waan kuu basaasee
Hadmaad i baanan?!
Basraay Basraay
Barashadaadii
Buur dheer i saartoo
Bugtaan ka qaadee;**

Aan bogsadee i baano Hay baal-marine i booqo”.

Maxaa, kolka, inoo diidaaya inaynu niraahno: “Madaxweyne hebel wuxuu dal hebel ku tegey sodcaal rasmi ah?”. Ama haddii aanay sababtu shaqo ahayn inaynu niraahno: “Wuxuu hebel dal hebel ku tegey dalxiis iyo daanshadaanhood?”. Ama haddii aanu sodcaalku hawl iyo dalxiis toona ahayn inaynu niraahno: “Qaraabo-salaan ayuu hebel meel hebla’ ku gaarey?”. Malahayga, jawaabtu waa waxba, waxaanse shaki ka qabaa warfaafinta Soomaalidu inay eraygaan *booqasho* u soo celin doonto macnihiisii uu, asal ahaan, u lahaa oo da’dii hore ee afka ina dhaxalsiisay ay u tiqiin.

9. Bogoole: Waxaan maqlaa weriyeyaasha qaarkood oo oranaaya: “Hebel oo wafti ballaaran hoggaaminaaya ayaa shalay goor hore wuxuu u boqoolay gobol hebel”. Waxaase igala darraa weriye kale oo aan maqlay isaga oo ku warramaaya: “Madaxweyne hebel ayaa xalay fiidkii dal hebel u boqoolay!”.

Markaas baan dib u xusuustaa macnihii koobnaa ee, asal ahaan, erayga *boqoole* uu afkeenna ku lahaa.

Wuxuu eraygani ka mid yahay dhawr kale oo, macne ahaan, la deris ah, Soomaaliduna ay ku kala tilmaanto xilliyada sodcaalka. Waa erayo aynu ku garan karno ‘qof hebel’ goortii uu sodcaalay iyo, halkii uu ku sugnaa, ammintii uu ka dhaqaaqay: Ma aroor bay ahayd? Ma waxay ahayd harsimo iyo wiirawiire? Ma galab bay ahayd? Mase habeen dumey bay ahayd?. Waxaa erayadaas ka mid ah: Jarmaado, kallaho, boqoole, dhalandhool, wirwir, carraabo, guure (guurid), gudoodi iyo malaha qaar kale oo haatan maankayga ka maqan.

Haddii uu qofku aroor hore dhaqaaqay waxaa la yiraahdaa: “Hebel wuu *jarmaaday* ama wuu *kallahay*”. Barqo-har-raac ama harsimadii haddii uu anabbaxayna waxaa la yiraahdaa: “Hebel wuu *boqoolay* ama wuu *dhalandhoolay* ama wuu *wirwiray*”. Haddii uu galab dhoofayna waxaa la yiraahdaa: “Hebel wuu *carraabay* ama wuu *galbaday*”. Haddii goor habeen ah uu waddada cagta saarayna waxaa la yiraahdaa: “Hebel wuu *dheelmaday* ama wuu *guureeyey* ama wuu *guuray* ama wuu *gudey*.”

Erayadaas mid qura ayaa laga maqlaa wartebyeyaasha warfaafinta afsoomaaliga ku hadasha; kaas oo ah ‘boqoole’ oo ay u adeegsadaan xilliyada sodcaalka oo idil. Iyada oo laga yaabo goor galab ah inuu sodcaalay ayaa qaar ka mid ah weriyeyaashu waxay ku warramaan: “Madaxweyne hebel ayaa shalay dal hebel u boqoolay...”; waana gef aan sabab lahayn. Maxaa, kolka, inoo diidaaya, haddiiba aynu naqaan goortii uu ninkaas madaxda ahi sodcaalay inaynu adeegsanno kolba erayga ku habboon oo goortaasi ay afkeenna hodonka ah ku leedahay? Waxay ila tahay: Waa waxba.

10. Qoomiyad: Waxaan maqlaa weriyeyaasha qaarkood oo ku warramaaya: “Nin u hadlay ururka magaciisu sidaas iyo sidaas yahay ayaa maanta waxa uu London ka sheegay in qoomiyadda Benaaddiriga si ulakac ah, iyaga gaar ahaan, loogu dulmay dagaalladii sokeeye ee Soomaaliya ka qarxay bilawgii 1991kii”. Ama mid kale oo oranaaya: “Xildhibaan hebel hebel oo Baydhaba shir-jaraa’id ku qabtay ayaa sheegay inaan qoomiyadda Digil-iyo-Mirifle ku qanacsanayn dhismaha xukuumadda cusub iyo, qoomiyad ahaan, tirada wasiirrada ee iyaga laga siiyey”. Kolkaas baa waxaan dareemaa macnaha erayga *qoomiyad* inaan aqoon dhab ah loo lahayn, gaar ahaan kuwii dadka kale iska hor-wadey ee ay ahayd erayada jaadkaas ah inay aad u aqoodaan.

Wuxuu eraygani ka soo jeedaa afka Carabiga (*Al-Qawmiyyah*), kasmobulshadeedka iyo siyaasadda kolkii loo eegona wuxuu la macne yahay erayga *ummah* oo isaga qudhiisu Carabiga inaga soo galay. Labaduba waxay muujinayaan dad dhul loo og yahay wada dega oo af iyo dhaqanba wadaaga, taariikh ay soo mareenna ay ka wada dhexayso. Qoomiyado dhawr ah ayaa dal qura ku noolaan kara, marar aan badnayna mid keliya ayaa ku noolaan karta. Dalalka ay qoomiyadaha badan ku nool yihiin ee ay Soomaalida deriska yihiin waxaa ka mid ah Itoobiya oo ay wada deggan yihiin Amxaaro, Tigraay, Cafar, Oroomo, iyo kuwo kale. Sidoo kale, qoomiyado kala duwani waxa ay wada deggan yihiin Keenya oo iyadana ay ku wada nool yihiin Kuukaayo, Luwo, Kalanjiin, Masaay, Luhya, Meeruu iyo soddomeeye kale. Intaasna waxay tu’ waliba gaar ahaanteed u leedahay dhaqankeeda, afkeeda, wax ay, hidde ahaan, u caabudi jirtey iyo, dhul ahaan, soohdimaho ay isu taqaan, loona yaqaan.

Soomaaliya iyadu waa dalka qura ee Afrika ku yaal, dadkiisuna ay wadaagaan af, diin, dhaqan, isir iyo geyi isku yaal oo aan loo dhexaynin, sidaas darteedna lagu sheegi karo dalalka qaaradda oo idil midka ay qoomiyadda qurihi ku dhaqan tahay. Cilmi ahaan, taasi waa arrin waayo hore laga faraxashay oo aan hadda dood la gelin karin, in kastoo lala wada yaabban yahay ummadda wax walba sidaas u wadaagtaayi sababta ay, siyaasad ahaan, isugu afgaran la’dahay.

Waase yaabe, arrinta sidaas ah, weligeedna aan laba ku murmini waxay u eg tahay warfaafinta afsoomaaliga ku hadasha qaarkeed in aanay oggolayn! Haddii aanay sidaas ahayn, maxay ku dhacday weriye idaacaddiisa dhanbaal u tebinayaa mar aan fageyn inuu yiraahdo: “Ammaanxumada waayadan Boosaaso ka jirtaa waxay saamaysay nolosha qoomiyado muddoba *Puntland* wax ka degganaa; kuwaas oo ay ka mid yihiin Koofurta Soomaaliya qaar ka soo jeeda iyo kuwo dalalka deriska ah ka yimid!”.

Ma aragtaa haddaba, isaga oo aan u dan lahayn, sida weriyuhu uu Soomaalida Koofurta u fageeyey, ugana dhigay qoomiyad dadka dhulka *Punt* ka duwan? Ma aragtaa sida uu u simay iyaga iyo qoomiyadaha Itoobiya ka yimid, markii loo eego Soomaalida Boosaaso iyo Bari ku nool?

Mar kale, waxay u eg tahay weriyayaasha qaarkood inay rabaan Soomaalidu inay ka koobnaato qoomiyado kala gaar ah sida derisyadeeda. Haddii aysan sidaas ahayn, maxaynu u maqalnaa *qoomiyadda Raxanweynta* ama *qoomiyadda Banaadiriga*, iwm? Mase meesha waxaasiba kuma jiraane, macnaha qoomiyadda ayaan inaga wada dhaadhacsanayn?. Malaha taa dambe ayaa roone, iyada u daa.

11. Qalanjo: Waxaan maqlaa *hebla' qalanjo*, iyada oo lagu celcelinaayo oo hablaheenna qaarkood naanays looga dhigaayo ama riwaayad la dhigi doono lagu xayaysiinaayo oo inanta jilaysa magaceeda la inoogu soo bandhigaayo. Markaas baan yaabaa oo haddana muusoodaa? Waxaan isweyddiyaa: Qalanjooy, maxaad tahay, erayguse ma yahay mid ku habboon macnaha aynu u xanbaarinnay?

Sida la og yahay, hooballada filimmada iyo riwaayadaha jilaa isku heer ma aha. Way kala waayo'aragsan yihiin, sidaas darteedna way kala kaalin weyn yihiin. Waxaa jira qaar laba ama saddex jeer oo keliya daawatada soo hor-joogsada iyo kuwo rakada tiyaatarka aan wax badan ka maqnaan. Waa kuwa dambe gudbinta qaybaha waaweyn ee sheekada kuwa lafdhabarta u ahi.

Markiise dhammaantood la isku soo kiciyo waxaa ugu kaalin weyn gabdhaha tu' ka mid ah oo soo-saaraha hawl-faneeddu (filin & masrax) uu ku doorto quruxdeeda, waayo'aragnimadeeda iyo bandhig-wanaaggeeda. Goleyaasha fanka ee Reer-Galbeedka waxaa gabadhaas oo kale looga aqoon jirey '*Prima donna*' oo la macne ah '*marwada koowaad*'; haatanse waxay ku koolkooliyaan erayada '*stella*' ama '*star*' oo afkeenna *xiddig* ku ah.

Innaga Soomaalida ahi si fudud baynu u marin-habownay markaynu isku daynay gabdhaheenna tilmaamahaas leh inaan ula baxno magac kuwaas shisheeye u dhigma. Waxaanse garan la'ahay qofkii erayga '*qalanjo*' ina soo hor-dhigay oo haddana ku guuleystey inuu ina oggoleysiyo, innaga oo aan waxba weyddiin!

Haddaba, sidii aynu ugu dagannay si ay inoogu caddaato, bal erayga macnihiisa aan toyanno. Oo durbadiiba intaan la soo boodo aan iraaqdo: Maroodiga lab waxay Soomaalidu ku magacawdaa *boor*, kiisa dheddigna *qalanjo*! Waxaa u daliil ah tuduc ku jira gabay uu Reer-Muduggu aad u yaqaan oo soddonnadii qarnigii 20d uu tiriyey gabyaagii caanka ahaa ee Ayax Maxamad Dhawre la oran jirey. Waa gabaygii 'Quursidiid' loo bixiyey ee qayb ka mid ah uu ku lahaa:

“.....

Qalanjada maroodiga ninkii waayo lagu qaybshey
Oo toban haruuboo qar jaran Eebbe kaga quudshey
Gujadiyo qaniinyada ninkii labadabuu quuray
Oo qaar-dambeedkiyo candhada feerka kaga qaaday
Oo caanuhuu qubay ilmadu qoysey baad noqone!

.....”

Runtii, markaan *'hebla' qalanjo'* maqlooba, waxaan is'iraahdaa: "Waaba qalanjo iyo qurux!". Waxaan isweyddiiyaa: "Ama boor ha ahaado ama qalanjo ha ahaatee, bilic lagu cawryo miyuu maroodi leeyahay? Ma wax inta heeso lagu tiriyo gabar lagu ammaani karaa? Ma wax inan dhaban leh lagu maakubi karaa?". Weli waxaan ka yaabbanahay ciddii hor iyo horraanba inoo soo jeedisey iyo fudaydkii aynu kaga oggolaannay, erayguna uu ku hirgalay!

Sow, kolka, kulama qummana inaynu niraahno, 'Xiddigta Filinka' ama 'Xiddigta Riwaayadda' kolka aynu xusayno gabdhaheenna dhabanka leh ee goobaha fankeenna ka hawl-gala.

12. Faro-ku-tiris: Erayga *faro-ku-tiris* waxa ay Soomaalidu ku tilmaantaa wax ay tiradoodu kooban tahay oo haddii ay ugu bataan toban gaari kara, haddii kalena kaba yar. Waa wax markii la doono in la tiriyo aan la kala illoobi karin oo faraha gacnaha lagu kawabin karo. Waxaad oran kartaa: "Hebel iyo hebli, in kastoo ay 3 sano isqabeen, haddana inta jeer ee ay meel ku kulmeeni waa faro-ku-tiris". Ama waxaad oran kartaa: "Dagaalladii Soomaaliya ka dhacay qoys aan dhibaato ka soo gaarini waa faro-ku-tiris."

Macnaha eraygu isaga oo sidaas ah ayaan maalin aan sii fogeyn waxaan dhegeystey idaacadaha afsoomaaliga wax ku tebiya middood. Weriyeaasha midkood ayaa wuxuu ka warramayaa nin geeriyooday oo u dhashay dalalka Geeska Afrika dal ka tirsan. Isaga oo ku ammaanaya halgankii gobannimada dalkiisa kaalintii weyneyd ee uu ka soo galay ayuu yiri: "Hebel, Allaha u naxariistee, wuxuu ka mid ahaa dadkii faro-ku-tiriska ahaa ee gobannimada dalkiisa u soo dagaallamay!".

Saan, keligeey baan ahaaye, waan muusooday. Haddiibana waxaa igu soo dhacday macnaha erayga *'faro-ku-tiris'*ku in aannu weriyahaas ka dhaadhacsanayn, haddii uu dhab u aqoon lahaana aanu sidaas ugu sirmeen, gefka sidaas u weynna aanu ugu dhaceen. Waxaan la yaabay macnihii uu u dan lahaa sida uu u seegay oo aqoon la'aanta eraygu ay ugu horseeday macne kale oo halis ah, hubaalna ay tahay inaanu ahayn kii uu u jeedey?!

Wuxuu u dan lahaa ninka geeriyooday inuu ku tilmaamo: Nin-karmeed aad iyo aad uga muuqdey halgankii gobannimada ee dalkiisu uu madaxbannaanida ku taabay. Hase ahaatee, taas kuma uu guuleysan, isla markaasna wuxuu meel uga dhacay ummad-weyntii uu ninkaasi ka baxay; isaga oo ku tilmaamay halgankeedii gobannimada, tiro ahaan, intii ka qayb-gashay inay aad u koobnayd; inay *faro-ku-tiris* ahayd!

Ma aragtaa sida uu u sinbiriirixday? Ma kuu caddahay, isaga oo aan is'ogeyn, godobta uu qaran idil iyo taariikhdiisa ka galay?! Shaki kuma jiro gefka xaddigaas leh in aynu ku dhici karayno marka aynu adeegsanno erayo, dhab ahaan, aynaan u aqoon macnaha ay xanbaarsan yihiin. Kolka, waxaa habboon qalabka warfaafinta markaynu hadal ku dawinayno amaba aynu wax ku qorayno inaynu

adeegsanno erayada kuwooda aynu dulucdooda naqaan oo keliya, inta kalena ayna isku shiddayn.

13. Dawlad & xukuumad: Waxaan maqlay weriyayaasha midkood oo oranaaya: “Sarkaal sare oo ka tirsan Wasaaradda Arrimaha Dibedda ee Maraykanka ayaa wuxuu waxqabad la’aan iyo fadhiidnimo ku eedeeyey dawladda Nuuri Al-Maaliki ee dalka Ciraaq”. Maalin kale ayaan haddana waxaan maqlay mid kale oo oranaaya: “Shalay ayaa waxaa Baydhaba shirkii ugu horreeyey ku yeeshay dawladda ra’iisul-wasaare Nuur-Cadde uu dhowaanta soo dhisay”. Labadan eray ee ‘dawladd’ iyo ‘xukuumad’ waxay ka mid yihiin erayada ay weriyayaashu isku beddashaan ee, marar badan, ay isku sida ugu adeegtaan kolka ay wararka iyo warbixinnada tebinayaan; taas oo aan sax ahayn. Labaduba waxay ka soo jeedaan afka Carabiga, Guddiga Afsoomaaliguna wuxuu sannadkii 1973kii go’aamiyey in iyaga la qaato marba, hidde ahaan, waxa ay tilmaamayaan haddii aysan ahayn hay’ado iyo fikrado ay bulshadeennu tihiin oo ay magacna u lahayd.

‘Dawladd’ oo marmarka qaarkood la garab-dhigo erayga ‘Qaran’ waxaa la adeegsadaa marka ‘state’ loo jeedo. Waa eray gudo weyn oo loo wada xanbaariyo laamaha saddexda ah ee maamulka qarammada casriga ahi uu u qaybsamo; kuwaas oo kala ah: Xeer-dejinta, Fulinta iyo Garsoorka.

Erayga ‘Xukuumad’ oo u dhigma ‘government’, isagu intaas wuu ka kooban yahay, si gaar ahna wuxuu u tilmaamayaa Laanta Fulinta ee dawladda. Haddii si kale loo yiraahdo, xukuumaddu waxay ka koobantaa wasiirka koowaad (Ra’iisulwasaare), wasiirrada uu maamulkiisa u magacawdo, wasaaradaha kala duwan iyo hawlwadeennada hay’adaha kale ee Adeegga Rayadka ah loo yaqaan (Civil Service).

Sidaas darteed, waa gef in la yiraahdo ‘dawladda Cali Geeddi; iyada oo loo jeedo xukuumaddiisa. Gef kaa ka sii weynse waxaa ah in la yiraahdo, ‘dawladda ku-meel-gaarka ah’; iyada oo loo dan leeyahay ‘xukuumadda ku-meel-gaarka ah.’. Waxaan is’iraahdaa: “Xukuumad waaba la gartay oo way dhalataa, wayna dhacdaaye, bal xaggee lagu arkay ‘dawladd ku-meel-gaar ah?!’. Jawaabtu waa meelna, waase haddii – Eebbe ka magane – aanay Dawladda Soomaaliyeed ku caddaan doonin dunida tii ugu horraysey oo ku-meel-gaar noqota!

14. Dawli & Caalami: Waxaa beryahaas laga hadlaayey heshiiskii 28kii Febraayo ee dhowaanta la dhex-dhigay xisbiyada dalka Keenya ee lagu kala magacaabo PNU & ODM; kuwaas oo ku eedoobey doorashadii Madaxtooyada ee dabayaaqadii sannadkii hore la qabtay. Maalmahaas bay ahayd markii aan maqlay wartebeeye ku warramaaya: “haddii uu heshiiskani hirgalo, wsaxaa hubaal ah inuu isbeddalaayo hannaanka *dawlīga* ah ee ay Keenya ku soo socotey 40kii sano ee ugu dambeeyey”. Mar kalena waxaan maqlay weriye arrimaha Soomaaliya ka faalloonaya oo leh: “Dagaalkii sokeeye ee muddada dhawr-iyotobanka sano ah dalka ka socdey wuxuu baabbi’iyey dhammaan hay’adihii *dawlīga* ahaa ee ay ummadda Soomaalidu lahayd”.

Ujeeddo ahaan, labada hadalba waa run oo muran kama taagna, waxaase gef ah erayga 'dawli' sida ay labada weriye ugu adeegteen, saa hay'ado dawli ah oo Keenya ama Soomaaliya ay leedahay ma jiraane, dal keligiis hay'ado dawli ah lihina ifka kuma abuurra.

Haddaba, dhibtu isaga ayay ka jirtaaye, macnaha erayga 'dawli' muxuu yahay?. Sida la garan karo, waxaa laga soo dhanbashay erayga 'dawladd', xagga naxwaha kolkii loola bayrona waa *tilmaame*. Waxaa lagu tilmaamaa dhaqdhaqaaq, urur ama hay'ad, aalaaba, ay dawladdaha dunidu si uun ugu wada lug leeyihiin. Toddobaatannadii qarnigii hore markii afsoomaaliga la qoray ayaynu u qaadannay inaynu ku beddalanno labada eray ee afafka Ingiriiska iyo Talyaaniga ka soo kala jeeda; kuwaas oo kala ah: *International* iyo *internazionale*.

Hay'adaha dawliga ahi way badan yihiin, waxaana, malahayga, ugu caansan 'Qarammada Midoobey' midda aynu u naqaan ee dawladdaha dunida oo idili ay maanta xubnaha ka wada yihiin. Axdiga asaaskeeda sida ku xusan, waa hay'ad loo abuuray in lagu ilaaliyo nabadda iyo xasilloonida dunida, waxaana wada dhisay qarammadii waayadaas gobta ahaa, ka dib markii Dagaalkii Labaad ee Adduunka laga soo doogey. Taas ka sokow, waxaa jira hay'ado dawli ah oo samafalka aadaminnimo oo keliya isku hawla, kolba meeshii macluul, cudur, dagaal ama dhibaato kale laga sheegona u guntada, gargaarna ula degdega. Waxaa ka mid ah hay'adaha lagu kala magacaabo: 'Caritas', 'Save the Children', 'Oxfam', 'Care International', 'Medecenes Sans Frontiers' iyo qaar kale oo daafaha dunida danleyda Adduunka Saddexaad ugu samo-fala. Waxaa iyaguna jira hay'ado dawli ah oo ku shuqul leh dhawrista Xuquuqda Aadanaha; kuwaas oo ay waayadaan ugu magac dheer yihiin 'Amnesty International' iyo 'Human Rights Watch'.

Sidaas darteed, doorashadii Keenya qalalaasihii ka dhashay waxa uu wax u dhibay waa waxqabadii hay'adihii dawladda Keenye, ma aha hay'adihii dawliga ahaa ee Keenya. Sidoo kale, dagaalkii sokeeye ee Soomaaliya waxa ku baabba'ay waa hay'adihii dawladeede, ma aha hay'adihii dawliga ahaa!.

15. Caalami: Erayga *dawli* waxaa la mid ah erayga *caalami* oo isaguna xagga Carabiga inaga soo galay, toddobaatannadii qarnigii horena afkeenna si rasmi ah loogu soo biiriyey. Waa eray aynu ku tilmaami karayno oo keliya waxyaalaha 'dawliga' lagu sheegi karo sida hay'adaha iyo ururrada ay hawlhoodu dunida inteeda badan ku wada baahsan yihiin. Hase ahaatee, marar badan ayaan maqlaa iyada oo siyaalo aan hagaagsanayn loo adeegsanaayo. Tusaale ahaan, mar baa waxaa dhegahayga ku soo dhacday iidheh idaacad 'FM' ah laga baahinaayo oo lagu leeyahay: "Xaafad hebla' waxaa laga furay *makhaayad caalami* ah oo magaceedu sidaas iyo sidaas yahay; taas oo aad ka heli karayso cunno kasta oo ay naftaadu jeclaato iyo shaqaale kuu jajaban intaba".

Marka uu weriyuhu sidaas leeyahayna waxaa suuraggal ah, xaafaddaas ha joogtee, in aanay makhaayaddaasi ifkaba meel kale kaga ool! Sidaasina waa gef, maxaa yeelay erayga *caalami* ma xanbaarsana macnihii uu weriyuhu u dan lahaa. Malahayga, wuxuu rabey intuu makhaayadda ammaano inuu yiraahdo: 'Waa makhaayad wacan' ama 'waa makhaayad wanaagsan', markaas buu adeegsadey erayga *caalami* oo meeshaani aanay meeshiisii ahayn.

Inta aan ogahay, makhaayad caalami ahi ma jirtee, waxaa jira hoteello caalami ah. Waa hoteello qaaradaha oo idil ku yaal, waxaana laga wada heli karaa magaalooyinka waaweyn ee dunida kuwa ugu magaca dheer. Meel kastaba ha ku yaalliine, waxay weligood leeyihiin magac iyo astaan qura, waxaana, aalaaba, iska leh shirkad qura ama qoys keliya. Xagga dhismaha, waa isku hab, midabkuna waa isku mid. Meel la joogoba, muuqaalkooda kore iyo midkooda guduhu ma kala duwana. Cunnada kolba ay martidooda siiyaan iyo sida ay ugu adeegaanna lama kala yaqaan.

Badanaa, waa hoteello qaali ah oo aan lagu wada degi karin. Ragga iyo dumarrada tanaadka ah oo keliya ayaa tammadiya oo inta habeenno ku hoyda ku raaxaysta. Hoteelladaas iyaga ah kuwooda ugu magaca dheer waxaa, haddaba, ka mid ah: Hilton, Meridien, Sheraton, Intercontinental iyo qaar kale oo siyaalahaas aan soo sheegay ku wada tilmaaman, sidaasna caalami ku ahaaday.

16. Jaamacad & Kulliyad: Galab ayaan waxaan dhegeystey weriye idaacadda uu ka xoogsado Jabbuuti uga soo warramaaya. Wuxuu yiri: "Magaalada Jabbuuti waxaa maanta laga furay jaamacad cilmiga takhtarnimada laga barto". Marar kale oo badanna waxaan maqlaa iyada oo la isugu warramaayo: "Hebel ama hebli sannad hebel ayay jaamacadda Lafoole ka qalin-jebisey!".

Halkaan waxay dhibaataadu ka taagan tahay erayga *jaamacad* oo labada jeerba sida loo adeegsadey ay laaxin tahay. Labada jeerba waxa laga hadlayaa waa *kulliyade*, jaamacad ma aha, waana laba magac oo afka Carabiga ay Soomaalidu ka soo amaahatay. In kastoo labadu ay xiriir dhow leeyihiin, haddana midkood waliba fikrad gaar ah iyo macne gooni ah ayuu xanbaarsan yahay. Maxay, haddaba, jaamacadi tahay, maxayse kulliyadi tahay?.

Waxaa *jaamacad* lagu magacaabaa dugsiyada wax laga barto midka ugu sarreeya ee, ugu dambaystana, markii laga aflaxo laga qaato markhaati-cilmiyeed lagu muujiyo ruuxa wataayi in kasmooyinka aadanuhu yaqaan middood uu dhab wax uga bartay. Laamo-cilmiyeed faro badan, isla markaasna kala duwan ayay jaamacad waliba u qaybsantaa, laan walbana *kulliyad* ayaa lagu magacaabaa.

Tusaale ahaan, Jaamacaddii Ummadda ee Soomaaliya, sida jaamacadaha kale, waxay ka koobnayd kulliyado faro badan oo isugu jira kuwo Kasmooyinka Sayniska lagu baran jirey iyo Kasmooyinka Bulshada kuwo lagu baran jirey.

Qaarkii sayniska lagu baran jirey waxaa ka mid ahaa Kulliyaddii Kiimikada, tii Handasada, tii Daawada, tii Xannaanada Xoolaha, tii Beeraha iyo kuwo kale. Qaarkii Kasmooyinka Bulshada lagu baran jirey waxaa iyagana laga magacaabi karaa tii Cilmi-afeedka, tii Warfaafinta iyo tii Barbaarinta ee Lafoole; taas dambe oo ahayd tii ugu horraysey, uguna magaca dheerayd kulliyadihii ay Jaamacaddii Soomaaliya ka koobnayd.

Haddaba, imminka ayay malaha inoo caddahay labada eray sida ay u kala duwan yihiin iyo macnaha uu mid waliba leeyahay. Waxaynu ogaanney waxa dhammaadkii sannadkii hore Jabbuuti laga furay inaysan jaamacad ahayne, ay ahayd kulliyad takhtarnimada laga barto. Sidoo kalena, waxaynu u ogaanney xaruntii Lafoole la baxday ee Kasmada Barbaarinta laga baran jirey, bareyaasha Dugsiyada Sarena ay ka soo qalin-jebin jireeni inay kulliyad ahayde, aysan jaamacad ahayn.

17. Hawl & Shaqo: Waxaan maqlay weriyeyaasha qaarkood oo oranaaya: “Hebel oo dal hebel ku maqnaa ayaa maanta ka soo noqday; isaga oo muddo bil ah halkaas *hawlo shaqo* ugu maqnaa!”. Maalin kalena waxaan maqlay wartebiye Xamar ka soo hadlaaya, kana warramaaya hoogga iyo ba’a ay weriyeyashu Soomaaliya ku qabaan. Markaas buu yiri: “Toddobaadkii aynu soo dhaafnay oo keliya waxaa Xamar lagu diley 3 weriye; iyaga oo *hawlahoodii shaqo* gudanaaya”.

Laba saddex jeer kolkaan weedhaas maqlay ayaan ogaadey inuu yahay gef hor leh oo dhowaan afka lagu soo kordhiyey; gef, weliba, aad u muuqda oo si fudud loo dareemi karo. Waa gef 20 sano ka hor qofkii ku tiraaba ay bulshadu ku qoonsan lahayd, ha yeeshee faca maanta joogaa aanay isdareensiin, qalabka warfaafintana aan cidii kula yaabin. Halkee baa, haddaba, uu gefku weedha kaga jiraa?. Jawaabtu waxay tahay: Wuxuu kaga jiraa israacinta labada eray ee kala ah *hawl* iyo *shaqo*, kuwaas oo, iyada oo aan waxba loo dhexaysiinnin, ay labada weriye adeegsadeen.

Sida ay Soomaali badani garan karto, hawl iyo shaqo waa laba eray oo ulajeeddo mid ah wadaaga, midkood walibana uu kan kale ku macne yahay. Qaamuus ahaan, hawli waa shaqo, shaqona waa hawl. Sidaas awgeedna, mid keliya ayaa kugu filan, haddii aad wax qoraysid ama qalabka warfaafintaba aad wax ka baahinaysid.

Dulucdeedu waxay tahay: Laba magac oo, iyada oo aan wax kale loo dhexaysiinnin, la israaciyaa waxba ujeedooyinka hadalka kuma kordhiyaan. Waxay la mid tahay adiga oo yiraahda: ‘Berri ‘Boosaaso Bandar-Qaasin’ ayaan u sodcaali doonaa?’. Ama adiga oo yiraahda: ‘Dad badan ayaa ‘duumo dhaxan’ sannad walba qaaradda Afrika ugu le’da’. Ama adiga oo yiraahda: ‘Hebel waa nin muran akeekan badan’. Erayada *Boosaaso* iyo *Bandar-Qaasim* waa laba magac oo isla magaalo keliya loogu yeero, haddii aad midkood ku sheegtona midka kale sheegistiisa baahi loo qabaa ma jirto. *Duumo* iyo *dhaxan* iyana waa

laba magac oo isla cudur qura loo yaqaan, waana cudurka qaniinyada kaneecada qaarkeed laga qaado. Haddii, kolka, aad labada mid ahaan adeegsatana midka kale adeegsigiisu waa hadaltiro. Sidaas oo kale, 'hebel waa muran badan yahay' inaad tiraahdo waa hadal la yaqaan, 'waa akeekan miiran' inaad tiraahdaana waa wax iyadana la garan karo. Ha yeeshee, waxa aan la garan karin oo innaba aan wax soo kordhinayni waa inaad labada eray israaciso, dabadeedna aad tiraahdo 'hebel waa nin muran akeekan badan'.

Haddaba, sidaynu soo aragnay, 'hawlo shaqo' waa laba eray oo israacintooda uu laaxin qurihi ka kordhaayo, waxaana iska cad haddii la israaciyo in aanu midkoodna kan kale macne cusub ku biirinayn oo ujeeddada guud ee hadalkana aanu faahfaahin dheeraad ah inaga siinayn.

Waxaa, kolka, habboonaan lahayd labada magac inta la kala xiriir-furo in midka hore tilmaan la raaciyo, lana yiraahdo: "Hebel oo dal hebel ku maqnaa ayaa maanta ka soo noqday; isaga oo muddo bil ah halkaas *hawlo dawladeed* ugu maqnaal". Ama in la yiraahdo: 'Toddobaadkii aynu soo dhaafnay oo kleliya waxaa Xamar lagu diley 3 weriye; iyaga oo *hawlahoodii warfaafineed* gudanaaya'. Ama in la yiraahdo: 'Raggii ay shalay maxkamaddu xukunkooda ku dhawaaqday waxaa ku jirey qaar inta xarig dheer lagu xukumay, haddana *shaqo adag* loogu daray'.

Maalin kale ayaan haddana waxaan maqlay weriyeyaasha midkood oo leh: "Dawladda Turkigu waxay qiratay inay shalay *guluf dagaal* ku qaaday waqooyiga dalka Ciraaq; halkaas oo ay ku weerartay dagaalyahannada Xisbiga Kurdiga ee Pkk lagu magacaabo". Waxaa weedhaanna ku jira gef la mid ah kii aynu soo aragnay oo ah israacinta laba magac oo aan waxba loo dhexaysiinnin. Waa israacinta *guluf* iyo *dagaal* oo ah laba magac oo mid waliba uu midka kale ka madax-bannaan yahay, in kastoo, qaamuus ahaan, ay isu dhow yihiin. Dagaal waa magac lagu tilmaamo waxa ka dhex-dhaca laba dhinac oo inta si uun wax ugu heshiin waayey faraha isa saara. Waa dirir oo waa islayn. Gulufna waa magac loo yaqaan col tiro yar oo fardooley ah. Sidaas darteed, labada israacintoodu ujeeddada waxba kuma kordhinayso.

Magac magac kale la raaciyaa sida ay laaxin u tahay oo aanay macnaha guud waxba ugu kordhinayn ayay tilmaan tilmaan la raaciyaana laaxin u tahay, iska daa maqlaha ama akhristaha inay garashada ujeeddada wax dheeraad ah uga iftiimisee. Intii muddo ahba waxaa Soomaalida dhexdeeda ka hirgalay oraah qalad ah, ha yeeshee aan cidina dhaagin. Waa oraahda, '*fiican badan*' oo Soomaali aan tiro yarayni ay hadda kaga jawaabto su'aalaha isnabdaadinta iyo iswaraysiga daarran sida: 'Maxaad sheegtay?...iska warran?...xalay maxaad ku barideen?... carruurtii sidee kuu yihiin?...reerkii maxaad kaga war-qabtaa?' iyo kuwa kale ee ay isku jaadka yihiin. Halkaanna waxa ay dhibaataadu ka jirtaa waa israacinta labadan eray ee kala ah *fiican* iyo *badan* oo ah laba tilmaamood, ha yeeshee aad arkayso si qalad ah in magac iyo tilmaan la isaga dhigaayo.

Sidaan meel hore ku soo sheegay, waa oraah qalad ah oo haddana afkeenna si sibiq ah ku soo gashay. Dad yar ayaa xusuusan taasina inay dhacday 1900 iyo toddobaatannadii qarnigii 20d. Waxaa beryahaas lagu kaftami jirey, oraahdaasna lagu dhaajin jirey niman shisheeye ah oo barashada afkeenna la daalaa-dhacaayey. Waxay ahaayeen injineerradii Shiinaha ahaa ee ku hawllanaa dhismaha waddada dheer ee isku xirta gobollada Hiiraan iyo Togdheer. Dabadeedna, Soomaali badan ayaa ku sirantay oo mooddey 'fiican badan' in lagu jawaabaa inay tahay oraah sax ah, mana aha oraah sax ah iyo wax u dhow toona!

18. Subax wanaagsan, habeen wanaagsan ..: Beryahaan dambe waxaynu maqalnaa weriyayaasha qaarkood oo, haddaynu nahay daawatada ama dhegeysteyaasha, kolkay ina bariidinayaan oranaaya: "Dhegeysteyaal, 'subaxnimo wanaagsan' ama 'galabnimo wanaagsan' ama 'fiidnimo wanaagsan' ama 'maalinnimo wanaagsan' ama 'habeennimo wanaagsan'" iyo qaar kale oo la too ah?

Sannad idil lagama joogo kolkay ay idaacadaha qaarkood bilaabeen dadka ay la hadlayaan in ay erayadaas ku salaamaan. Dabadeedna, dhallinyarada warbaahinta ayaad mooddaa inay ku daateen, isagana daydeen adeegsiga nabdaadinta caynkaas ah, gaar ahaan marka ay soo-jeedinta barnaamijyadooda gudo-gelayaan.

Haddaba, isnaabdaadinta sidaas ahi, af ahaan, ma hagaagsana, waxaana ku jira laaxin loo baahan yahay in laga saxo. Hase ahaatee, inta aanan laaxinkaas soo dibed-bixin, aan dib ugu yare noqdo hababkii ay Soomaalidu isu nabdaadin jirtey, gaar ahaan waayadii dhaqankeedu uu, badiba, reer-miyinnimada ku dhisnaa.

Laba qof oo aan is'aqooni kolkay meel isaga hor-yimaadaan, kolba koodii nabdaadinta ku hormara ayaa wuxuu oran jirey: "Nabad ma sheegtay?". Markaas buu kan kalena wuxuu ku jawaabi jirey: "Nabad baan sheegaye, adigu maxaad sheegtay?". Kolkaas ka dib ayay is-haybsan jireen, iskana waraysan jireen mid waliba waxa uu rabo inuu wax ka ogaado iyo dantii uu ku raad-joogey: Baadi-xoolaad, abaar iyo aaran, roob iyo deegaan, colaad iyo nabad iyo dhammaan labada mid walba meesha ay saantiisu ka soo jeeddo wixii lagu qabey. Taasina waa markii ay arrintu joogto laba ruux oo socoto ah ama koox negi oo meel shiran ku ah iyo koox kale oo markaas la soo joogsatey.

Ha yeeshay, waxaa jirta isnaabdaadin kale oo si gaar ah iyada looga garan karo dhinacyada isnaabdaadinayaa waqtiga ay markaas ku sugan yihiin; ma habeen baa, ma maalin baa?. Bal tanna aan tusaaleeyo: Nin socoto ah ayaa goor ay fiid hore tahay waxa uu la soo joogsan jirey reer, wax yar ka hor, rugahoodii u soo hoydey oo xoolihii soo xeraystay oo maalay oo carruurtii seexsaday amaba ay markaas u seexanayso. Goortaa oo kalena nabdaadinta ninkaasi waxay u badnayd inay noqoto: "War maxaa lagu soo uruuray?". Dabadeedna, odayga reerka u weyn ayaa ku jawaabi jirey: "Nabad baan ku soo ururayee, adigu

maxaad sheegtay?”. Halkaas buu iswaraysiga kale ka sii socon jirey, ninkaasina reerka ayuu habeenkaas martiyi jirey ama meel kale oo uu yaqaan ayuu u sii dheelman jirey.

Isla ninkaas socotada ahi kolkuu waabberigii ku soo baxo reero kale oo xoolihii ay weli u xeraysan yihiin oo markaas haruubbada u qaatay amaba kala soo baxay waxa uu ku nabdaadin jirey: “War maxaad ku barideen?”. Ama ‘Maxaa lagu beryey?’. Ama ‘Ciddu maxay ku bariday?’. Odayga reerka ama ragga waaweyn ee uu dhalay midkood ayaa markaasna ku jawaabi irey: “Nabad baannu ku barinnay. Alxamdulillah. Wax soo aaddan Allaa og. Wax weyddiin ogaal. Warkayaa inta le’eg. Waa sidee, adigu maxaad sheegtay?”.

Mararka qaarkood haddii ninkaas reerka lihi uu daysanaayo ee uu gocanaayo dareen dhowaan qoladooda la soo gudboonaadey (sida rag laga laayey, xoolo laga mooradduugey, dumar laga boojiyey, iwm), nabdaadinta ah ‘maxaad ku barideen?’ wuxuu kaga jawaabi jirey: “La soo kaakac. Nin iyo waagii. Madaxa la qaad! Aadane mooyee, Eebbe wax ka sheegan mayno! Ninkeed-dhibi ma yara’ iyo erayo la mid ah oo midka socotada ahi uu ka garan jirey dhacdo aan la mahadini inay reeraha ku cusub tahay.

Guud ahaan, sidaas bay muddo dheer isnaabdaadinta Soomaalidu iska ahayd, waxayse wax iska beddaleen oo ay wax ku soo kordheen xilligii Gumeysiga, gaar ahaan barkii labaad ee qarnigii 20d. Qayb weyn oo bulshada Soomaaliyeed ka mid ahi waa markii ay reer-magaalowdey. Dhallinyaro door ahi waa markii waxbarashada casriga ah ay dugsiyadii shisheeyuhu furay ugu xeraysatay. Waa xilligii ay bilaabatay inay dhexdeenna ka hirgalaan hababkii isnaabdaadinta ee qarammadii ina gumeystey ay ina bareen sida: *Buon giorno, Buon pomeriggio, Buona sera, Good morning, Good afternoon, Good evening*, iwm.

Muddo waxay sidaas ahaato oo hababkii isnaabdaadinta afafka shisheeyaha lagu xarragoodaba, waxaa la soo gaarey dhammaadkii 1900 iyo afartannadii iyo bilawgii 1900 iyo kontonnadii, markaas oo xisbigii gobannimoddoonka ee Leegada (SYL) loo yiqiini uu calan-wallaynaayey. Sida laga yaabo in weli la xusuusan yahay, waddaniyad heer jidbo gaarsiisan iyo qab ummadnimo oo caqiido diineed lagu saawayn karo ayuu xisbigu beryahaas dadkii ku wada tallaalay, waxaana ujeedooyinkii u dhignaa ka mid ahaa in afsoomaaliga la qoro, sidaasna afafka shisheeyaha looga maarmo.

Haddaba, sannadkii 1949kii ayaa magaalada Xamar iyo Leegada dhexdeeda waxaa laga unkay urur-dhaqameed la baxay, ‘Goosanka Afsoomaaliga’; kaas oo ay asaastay dhallinyaro uu, Allaha u naxariistee, hormuud u ahaa afyaqaankii la oran jirey Yaasiin Cismaan Keenadiid. Waxay ahaayeen dhallinyaro aqoonta dhaqankooda ku darsatay tii casriga ahayd ee ay ka kororsadeen dugsiyada maamulkii Talyaaniga iyo kii Ingiriiska ee dal-weynaha Soomaalida u wada taliyey intii u dhexaysey 1941-1950kii. Waxay ahaayeen qaar uu derderey jacayl aan soohdin lahayn oo ay u qabeen afsoomaaligooda; kaas oo ay u arkayeen

eray iyo oraahba, inuu aad hodon uga yahay, sidaas darteedna aanu u baahnayn afaf qalaad erayo looga soo amaahdo. Markaas bay aad isugu hawleen eray kasta oo afafka shisheeyaha ku abtirsada, Soomaaliduna ay ku hadasho inay ku beddalaan ku' la mid ah oo, asal ahaan, afsoomaali ah. Xilligaas ayay bilaabeen waxa aynu haatan 'eraybixinta' u naqaan. Xilligaas ayay afka ku soo dareen erayo faro badan oo ku cusbaa, eeggase ka mid noqday.

Xilligaas ayay dhallinyaradaasi waxay Soomaalidii reer-magaalka ahayd ka reebeen ku-adeegsiga isnaabdaadintii afafka shisheeyaha uga timid, dhowaantana ay qaayibeen. Waa xilligii ay soo saareen weedhaha ay ka midka yihiin : 'Subax wanaagsan', 'galab wanaagsan', 'habeen wanaagsan' iyo 'maalin wanaagsan', kuwaas oo haddiiba bulshada dhexdeeda ka hirgalaya, lagagana maarmay: Good morning, Good afternoon, Good night, Buon giorno, Buona sera, Buon pomeriggio iyo weedhaha qalaad ee la midka ah.

Sida, haddaba, inoo wada cad, isnaabdaadintan cusubi waxay mid waliba ka kooban tahay laba eray oo qura. Erayga hore waa magac sida subax, galab, habeen iyo maalin. Midka labaadna waa tilmaan oo waa 'wanaagsan'; kaas oo magac walba gadaal ka raaca.

19. Oddoros: Saraakiisha Jamciyadda Quruumaha ayaa markii ay muddo joogaanba ka soo dega garoonka No. 50, si ay u oddorasaan habka ay kaalmadu dadka u baahan ay u qaareyso.

20. Qardajeex: Mar dhawr bilood haatan laga joogo ayaa meel Boosaaso u dhow waxaa lagu af-duubay weriye Faransiis ah oo hay'addii warfaafineed ee uu u shaqaynaayey xagga masawir-qaadidda ugu qaybsanaa. Wuxuu doonaayey, isaga oo maamulka dhulka *Punt* aan ogeysiin inuu gaaro xeebta Mareero la yiraahdo; halkaasna uu kala soo laabto masawirro uu ka soo qaado dadka Yaman doolka ugu sodcaala ee doonyaha halakaysan inta la iga ijaaro badda tarabtarabta ugu le'da. Masawirradaasi waxay noqon lahayeen kuwii ugu horreeyey oo dadkaas geerida u bareeray ay dunidu abid ka aragto, weriyuhuna, hadday u suuraggasho, intay magac dheeriyi ka raacdo ayuu haddana ku dallici lahaa!

Dabadeed, madaxda geyigaas nin ka mid ah oo ka jawaabaya su'aal ay idaacadaha qaarkood weyddiiyeen ayaa yiri: "Weriyaaha Faransiiska ah ee halkaas lagu af-duubay wuxuu ahaa nin *qardajeex* ku socda". In kastoo uu dedaaley, haddana ninkaas madaxda ahi kuma uu guuleysan macnihii uu rabey erayga ku habboon inuu afka uga helo. Ulajeeddadiisu waxay ahayd weriyaha la afduubay inuu taxaddar li'i ku canbaareeyo. Wuxuu doonaayey inuu ku eedeeyo waxa ku dhacay iyo burcadda uu u gacan-galay inuu isagu isu geystey, markii madaxda dhulka *Punt* uu sodcaalkiisa kala tashan waayey oo bedbaadadiisa uu iyaga ugu magan noqon waayey. Markaas buu adeegsadey erayga *qardajeex* oo tilmaamaya falkii uu weryuhu ku kacay mid ka fudud.

Maxaa, haddaba, *qardjeex* la yiraahdaa? Waa laba eray oo wadajir ahaantooda loogu tilmaamo ku-sodcaalka dhulka ay geedaha badani ka baxaan ee aan waddooyinka lahaayeen. Waxaa la yiraahdaa: “Roobab mahiigaan ah oo waddada gooyey dartood, baabuur badan ayaa saaka magaalada qardajeec ku soo gashay”. Waxaa kaloo la yiraahdaa: “Ma og tahay hebel intuu jidkii xalay ka habaabay inuu soo qardajeexay, dabadeedna uu yimid, isaga oo ay qodxo ka meel-waayeen”.

Badanaa, socodka sidaas ah qofka u bareera ama ay dani baddoba loogama cabsado dhibaato weyn oo ay noloshiisu halis ku geli karayso. Malaha, waxa ugu daran oo soo gaaraayi waa qodxo muda ama maryaha ka dillaaciya iyo geed-gaab uu ku xajiimoodo kolka oogadiisa inteeda bannaan ay istaabtaan. Cabbaar ka dibna, waxay u badan tahay inuu qofkaasi helo tubo toosan, waddooyin haloosi ah ama dhul bannaan oo uu ku sodcaalo.

U malayn maayo, kolka, falka weriyuhu *qardajeex* uun haddii uu ku ekaan lahaa in wargeyskii uu u shaqaynaayey, dawladda Fransiiska ee uu u dhashay iyo Midowga Yurubba ay bedbaadada naftiisa uga welweli lahaayeen sidii xoogga lahayd ee ay uga welweleen dhawrkii maalmood ee uu gacanta burcadda ku jirey. Weriyuhu isaga oo og dhulka uu marayo inaan kala-dambayn sidaas ahi ka jirin ayuu haddana u bareeray inuu keligiis sodcaalo. Sow isagu kuma dhiirran maamulka gobolka intuu iska indho-tiro in keligiis cad oo madow uu Mareero isa sii taago; isaga oo og inay keli-safriddaas halisi uga imaan karayso, halka uu u socdaana aysan ahayn xeeb ku-bedbaadiddeeda la hubo oo lagu masayn karo xeebaha koonfurta dalka Faransiiska ee Cote d'azur loo yaqaan!.

Haddaba, falka weriyaha shisheeye lagu eedeeyey qardajeex lama yiraahdee, wuu ka weyn yahay. Waa *jar-iska-xoornimo* ama waa *qar-iska-tuurnimo*. Sidaas awgeed ninkii madaxda ahaa ee waraysiga bixinaayey waxaa ku habboonayd inuu ku jawaabo: “Weriyaha Faransiisku wuxuu ahaa nin jar-ika-xoor ah, haddii kale qar-iska-tuur ah”.

21. Shaac-ka-qaad:

22. Kaalin libaax leh

**B. Erayo shisheeye oo aan baahi loo qabin:
kuwa Soomaaliyeed maxaa lagu nacayaa?**

Soomaalidu, sidaynu wada og nahay, waa ummad wax-akhriska iyo qoraalkuba ay ku cusub yihiin. Sidaas darteed, waa ummad idaacadaha aad u dhegeysata oo jecel waxa dunida ka dhacaaya inay ku maqasho afka ay garanayso oo keeda ah. Markaan anigu hanaqaaday, dhallinyaro iyo waayeelba, wararka uu weriyuhu tebinaayo ka sokow, afsoomaaliga uu ku hadlaayo ayaa loo fiirsan jirey. Weriyeyaasha ayaa la kala baran jirey. Sidaas darteedna, maalinta 'hebel' uu warka leeyahay ama 'barnaamij hebel' uu soo tebinaayo, si wacan ayay dhegaha loogu raaricin jirey, 'hebel' kale maalinta uu soo sheegayose, codka raadiyaha ayaa la iska gaabin jirey! Waa la iska dhigi jirey oo waxaan garanayaa iyada oo ay dhallinyaradu isku daydo '*weriye hebel*' inay dhaajiyaan oo sida uu u hadlo ay iyaguna u hadlaan, erayada uu badanaa adeegsadana ay weerahooda ku soo daraan. Sidoo kale, weriyeyaasha barbaradka ah qudhoodu waxay ku dedaali jireen inay isu ekaysiiyaan kuwii caanka noqday ee ka horreeyey midkood; taasoo ay ka filayeen aqoonsiga dhegeysatada inay si degdeg ah ugu taabaan.

Taas darteed, waxaynu weriyaha ku tilmaami karaynaa, shalay iyo maantaba, toos iyo gurracba, bare ay dhegeysatadu afka ka bartaan oo, dhinaca waxabarashada guud, bulshada aad uga saameeya. Malaha, waa sababta inoo faysaysa weynida xilka daryeelka afsoomaaliga ee weriyeyaasha maanta dusha ka saaran; xilkaas oo ay ka soo dhalaaleen warfidiyeennadii wax ka soo tebin jirey idaacadaha afsoomaaliga ku hadla sannadihii konotonnadii, lixdannadii iyo toddobaatannadii qarnigii hore iyo, guud ahaanba, wixii qorista afka ka horreeyey.

Afka oo aan qornayn iyo ka dibba, waa raggii ku guuleystey, war iyo warbixinba, dhegeysatadooda inay ugu gudbiyaan afsoomaali barax la'. Waa ragga lagu xusuusan doono aqoontii qabku weheliyey ee ay u lahaayeen dhaqankooda iyo afkooda. Waa ragga ay tahay inaynu ku maamuusno sidii ay afsoomaaliga u kobciyeen ee ay uga dhigeen af qaadi karaya fikradaha casriga ah iyo eraybixinta afafka qalaad ee sayniska, teknoolojiyada iyo kasmooyinka bulshada. Waxay ahaayeen raggii afka ku soo daray erayo faro badan oo awel hore aan ku jiri jirin, haatanse ka mid noqday sida:

1. dayax-gacmeed (satellite)
2. Qarammada Midoobey (United Nations)
3. hantiwadaag (socialism)
4. horumar (progress)
5. hubka halista ah (nuclear weapons)
6. hubka iswada (automatic weapons)
7. hirarka gaaggaaban (short waves)
8. hirarka dheerdheer (long waves)
9. hirka dhexe (medium wave)

10. biyo-dhaca Victoria (Victoria falls)
11. barwaaqo-sooran (commonwealth).
12. geeddi-socodka nabadda (peace process)
13. buuraleyda Goolan (Golan heights)
14. maan-dooriyeyaal (drugs)
15. gacan-ka-hadal (violence)

...iyo qaar kale oo dharaar noolba aynu ka maqalno idaacadaha Afsoomaaliga ku hadla.

* * *

Arartayda iyo ulajeeddada ka dambaysaaba waxaad mooddaa in ay u eg tahay maahmaahdii ahayd: 'Wadaad maqan ammaantii, waa wadaad jooga caydii!'. Waana loo qaadan karaa. Runtii, weriyeyaasha da'dii hore waxaa i xusuusiyey dhalinyarada dhowaanta warfaafinta ku soo biirtay oo qaar ka mid ah aan ku darraabaayo sida ay uga liitaan afsoomaaliga tayada sare leh ee idaacadaha u qalma iyo, isla markaas, sida ay u moog yihiin, afsoomaaliguna, tabta afafka kale, inuu barasho uga baahan yahay.

Haddaba, taag iyo aqooni meel ay dhigtoba, xilka daryeelka afsoomaaliga intiisa ugu weyni, maalin kaleba yeelkeede, waxa uu maanta dusha ka saaran yahay qolyaha warfaafinta, gaar ahaan idaacadaha iyo warfidiyeennada ka xoogsada ee wararka iyo warbixinnadaba ka dawiya. Taas aniga oo maanka ku haya, bal aan tusaaleeyo gefafka dhegeysiga idaacadaha qaarkood aan ka qabtay oo warfidiyeenka xilligan aan farta ugu fiiqaayo, si aynu u ilaalinno bedqabka tiirarka dhaqankeenu ku qotomo midka ugu qaalisan; waa afsoomaaligee. Gefafkaas oo aan ka yaabaayo, haddii aan daymo loo yeelan, inay sidaas ku hirgelaan ayay ila noqotay inaan dadka ku baraarujiiyo, in kastoo aanan hubin sida ay mudan yihiin in dhegaha loogu raaricin doono.

Yeelkeede, gefafkaas oo dhawr qaybood loo kala dhigdhigi karo waxaa ka mid ah:

1. Gefaf erayada afka qaarkood ku saabsan;
2. Kuwo xagga naxwiiisa la xiriira; iyo;
3. Erayo afaf shisheeye ka soo jeeda oo dhiggooda afkeenna laga heli karo, sidaas darteedna aan adeegsigooda baahi loo qabin;
4. **Tarjamad xarfi ah iyo wax-curis la'aan: Oraah inta warbaayiyaasha midkood inta** maalin laga maqlay looga wada dayday; iyada oo aan afka laga waayin si kale oo loo yiraahdo.

Intaas aan ku dhaafo 10kaasi erayada ay ka midka yihiin ee warbaahinta qaarkeed ay sida qaladka ah u adeegsato, una gudbo kuwo afaf shisheeye laga keenay oo aynu maalin walba maqalno. Waa dhab oo afafka adduunku erayada way kala amaahdaan, hase ahaatee amaahashada caynkaas ah waxaa lagu oggol yahay markii ay kuwa afkaagu kugu yaraadaan. Haddaba, su'aashu waxay

tahay, 'kuweennii oo daf ah maxaynu qaar qalaad ku falaynaa?.' Erayadaas afafka shisheeye gardarrada ay uga soo qaataanna waxaa ka mid ah:

1. Suxufi: Bartamihii 1900 iyo sagaashannadii ayuu eraygani si kediso ah dhinac walba inooga soo galay. Hotel suxufi! Suxufi Xamar jooga! Suxufi 'wargeys hebel' ka tirsan! Hebel ayaa meel hebla' suxufiyiin kula hadlay! Cidina isma weyddiin: eraygu halka uu ka soo jeedo iyo mid u dhigma in aynu leennahay iyo in kale. Waa lagu qamaamay, laguna kawkabay sidii ari wax badan biyo ka qatanaa oo kaalinkii ceelka iyo isaga la isaga dhex-baxay!

Horta eraygu waa carabi, isaga oo sax ahna waxay carabtu ugu dhawaaqaan (As-Saxafi). Waxaa laga soo dhanbashay erayga asalka ah: 'As-Saxaafah.' Afsoomaaliga waxa uu ku yahay warbaahin amase warfaafin oo inooba ahaa magac wasaaradeed. Miyaynu illowney *Wasaaraddii Warfaafinta?*! Qofka ka shaqeeya amaba hawlaha warfaafinta u tababararan, sow taynu ku magacaabi jirney warfidiyeen? Sow taynu lahayn *warfidiyeenno soomaali ah?* Bal maxaa lagu nacay oo 'suxufi' iyo 'saxaafad' looga doortay?

Lama yaqaan sababta ay weriyeyaashu iyaga ku jeclaysteen; iyaga oo heli kara dhiggooda oo afsoomaali ah.

2. Muhaajiriin: 10kii sano ee u dambaysey waxaa soo kordhaayey dunida saddexaad dadka ka tirsan ee sida qarsoodiga ah Yurub ugu soo qulqulaaya. Sida la malayn karo, sababuhu waxay u badan yihiin dagaallo sokeeye oo ay ka baxsanaayaan ama dandarro xagga dhaqaalaha ah oo ay u joogi kari waayeen. Qulqulkaasi mar walba ma tabaalo la'a, waxaana badaha ku baabba'a dad faro badan oo inta lacag laga qaatay doonyo aan hagaagsanayn laga soo buuxiyey. Cid walba dadkaasi waa leeyihiin, waxaase u badan kuwa ka dalaaba Bariga Dhexe, Afrikada Waqooyi, Geeska Afrika iyo Yurubta Bari.

Si joogto ah ayaa, haddaba, ay dadkani wararka ugu jiraan, waxayna idaacadaha qaarkood ku tilmaamaan 'muhaajiriin'; iyada oo aad mooddo inay afsoomaaliga eray uga waayeen ama inay uga helaanba aan isku dhibin. Socodka sidaas ah ee dal iyo degaan hore inta laga tago lagu aado dal iyo degaan hor leh waxa ay soomaalidu u taqaan *doolaalo*, dadka sidaas yeelana waxaa la yiraahdaa *dool*.

Libaaxa ayaa ka mid ah dugaagga doolaalada lagu yaqaan ee, badanaa abaaraha dartood, kolba dalkii uu joogi jirey mid aan ahayn lagu arko. Markaas oo kale waxay oran jireen, "Libaax *dool* ah ayaa degmada soo galay" oo ay ula jeedaan libaax degaammo kale ka soo *doolaalay* amba ka soo *dalandooley*. Cayaartoygii jiihsaday ee gabadhii uu jeclaa farriinta daboolan u diraayey waa kii lahaa:

'Libaax dalandooley duur ma ceshee
Digaay! dalku waysku yaallaa"

Sidaas darteed, weriyeyaasheennu uma baahna erayga 'muhaajiriin' oo carabi ah inay dhegeyeyaasha wax ugu sheegaan. Waxaa ku habboon inay yiraahdaan, "Dal hebel dad ka soo *doolay* ayaa xeebaha Yurubta Galbeed shalay soo gaarey" ama " 200 oo qof oo *dool* ah ayaa markab kula jabay bartamaha badyarada Cadmeed."

3. Bareejo: Barnaamijyada cayaaraha oo lagu soo qaato tartanka kooxaha kala duwan dhex-mara waxaynu ku maqalna weriye meel wax ka soo tebinaaya oo leh, “Koox hebla’ iyo koox hebla’ cayaar kubbadda cagta ah oo magaalo hebla’ ku dhex-martay waxay ku dhammaatay *bareejo*; mid walibana 2 gool ayay dhalisay. Waa eray af-talyaani laga soo qaatay *pareggio*’ oo aan weriyaha soomaaliyeed baahi u qabin, maxaa yeelay waxa uu haystaa erayo u dhigma oo sal adag afkiisa ku leh.

Wuxuu haystaa erayada ah *‘barbarro’* ama *‘barbardhac.’* Markaas ayuu ku soo warrami karaa, “Koox hebla’ iyo koox hebla’ oo xalay cayaari ku dhex-martay garoon hebel ayaa *barbarro* noqday. Ama waxa ay oran karaan, “cayaartii labada kooxood waxay ku idlaatay *‘barbardhac’* markii ay tu’ waliba 2 gool dhalisay.” Labada erayba waxay ka soo jeedaan xeerarka cayaaraha bardooddanka ee, hidde ahaan, ay soomaalidu u lahayd sida legdanka, bootimaalaysiga, yoolyoolka iyo kuwa la midka ah;

4. Mr. Guuleed ama **Mr. Faarax:** Gobannimada ka hor soomaalidu ma lahayn talis dhexe oo dalka ka wada taliya. Ma aynu lahayn boqorro ciidammo leh oo laga baqo, amarkoodana lagu wada qasbanaa. Wiilwaal iyo qaar kale oo tiro yar markii laga reebo, boqorrada, garaaddada iyo ugaasyada soomaalidu ma lahayn awoodda wax-muquuninta ee kuwa dhiggooda ahi ay dunida kale ku lahaayeen. Astaan-sharafeed ayuun bay tolka u ahaayeen, waxayna u guddoomin jireen kolba wixii talo ah oo ay guurtidu ula timaaddo.

Sidaas darteed, waxaa la inagu tilmaamaa inaynu nahay ‘bulsho wada siman’ (egalitarian society) oo aan lahayn hannaanka kala-sarraynta ee ummadaha kale ay soo mareen, welina ay ku dhaqmaan. Taasina waxyaabaha ay keentay waxaa ka mid ah afkeenna in laga waayo erayada tilmaama meekhaanka siyaasadeed iyo midka bulsho ee ay u badan tahay afafka ummadaha kale in laga helo. Madax-dhaqameedka iyo shiikha buuniga ah mooyee, nin walba waxaynu ugu wici karaynaa magaciisa oo keliya; iyada oo aynaan waxba ka hormarin.

Hase ahaatee, waxay sidaas ahaatoba, bartamihii toddobaatannadii qarnigii hore ayay xukuumaddii Kacaanka ee hantiwadaagga ahayd waxay malaha u baahatay eray afsoomaali ah oo u dhigma midkii ay bulshada shuuciga ahi isugu yeeri jirtey, iskuna aqoonsan jiretey; kaas oo ahaa erayga *tvarish* markuu ruush yahay, *comrade* markuu ingiriis yahay iyo *compagno* markuu talyaani yahay. Dabadeed, maalin maalmaha ka mid ah, isaga oo Shabeellaha Hoose kormeer ku maraya ayuu madaxweyne M. Siyaad Barre wuxuu meel fagaare ah ka soo jeediyey inuu door-bidaayo erayga *‘jaalle’* in la qaato, laguna beddalo erayada shisheeye ee kala ah: *Mister*, *Signore* iyo *As-Sayid* oo ah kuwo afaf shisheeye laga soo amaahday, magacyada dadkana, maamuus ahaan, looga hormariyo. Wuxuu ahaa eray hore oo tartanka iyo cayaaraha bardooddanka ay soomaalidu ku tihiin, gabayadii horena muush ka ah. In kastoo waayadii dambe *midab hantiwadaag* loo yeelay, haddana wuxuu noqday eray si degdeg ah u hirgalay oo ka mid noqday eraybixinta siyaasadeed ee Soomaaliyadii xilligaas.

Sidii ay xukuumaddaasi u burburtayba, eraygaas cidina ma soo qaadin, wax beddalayna idaacadaha kama hirgelin. Marmar ayaa la maqlaa erayga *‘mudane’* oo ah eray xilligii Kacaanka ka horreeyey lagu aqoonsan jirey raggii baarlamaanka loo soo dooran jirey. Magacyadooda ayaa laga hormarin jirey,

iyaga ayuun buuna gaar u ahaa. Waxaa la oran jirey, “*Mudane* hebel-hebel ayaa meel hebla’ tegey” ama “sidaas iyo sidaas yiri”. Mase ahayn naanays-sharafeed rag oo idili u sinnaa.

Si kastaba ha ahaatee, weriyayaasha qaar ka mid ah ayaa waayadan waxay adeegsadaan erayga *Mister (Mr.)* marka ay wararka ku xusayaan nin soomaaliyeed; magac ha lahaado ama yuusan lahaane. Waxaa, haddaba, aniga si aad ah iila qaab daran in qof afsoomaali ku hadlayaa uu yiraahdo *Mr. Guuleed* ama *Mr. Faarax* oo ah laba eray oo aan meel wada geli karin, la isna oggolaysiin karin!

‘Jaalle’ iyo ‘mudane’ haddii aan la rabinna, waxaa ila habboon, cidna damqi maysee, magaca oo sidiisa ah in la sheego;

5. Tirada telefoonka: Ma aqaan in la ila dareemay iyo in kale, waxaanse la yaabaa soomaalida xilliyadan oo, yar iyo weynba, tirda telefoonka af-ingiriis isugu sheegta. Tusaale ahaan, qof baad ku leedahay, “Telefoonkaaga ama midka hebel ii yeeri”, markaas buu inta kuu bilaabo ku oranayaa, “Qoro: *eight, nine, three, five, four, six.....*” ilaa uu dhammeeyo! Maxaa loo qaadan karaa? Kolley saboolnimo xagga afsoomaaliga ah looma aanayn karo, mana aha inaan qofku afkiisa tirada ku aqoon, maxaa yeelay iyada iyo abtirsiinaduba waa aqoonta ugu horraysa ee aynu hooyada ka baranno. Maxaa u diidaya inuu yiraahdo, “siddeed, sagaal, saddex, shan, afar, lix.....?”

Mar kale: maxaa loo qaadan karaa ama lagu fasiri karaa? Bal adba!;

C. Gefaf naxwe: **hababka wadaraynta magacyada:**

Sida afafka kale, afsoomaaligu wuxuu leeyahay xeerar dhismaha weedhiisa xukuma. In kastoo aan dadweynaha si ballaaran loogu dhex-faafin, haddana xeerarkaasi maanta waa kuwo intooda badan la yaqaan. Iyagaas ayaa qaabeeya isrogrogga falka, qaybaha magacyada iyo sida loo kooxeeyo, qodobbada uu magac waliba qaadan karo, qurubyada iyo sida ay weedha u saameeyaan, qaybaha hadalka mid waliba meesha ay weedha ka gasho iyo wixii la hal-maala. Haddaba, aan halkan si kooban ugu soo bandhigo qaybo ka mid ah gefafka xagga naxwaha afka ku saabsan ee warfidiyeennada qaarkood ay ku dhacaan kolka ay barnaamijyadooda dawinayaan, gaar ahaan wadaraynta magacyada iyo wixii la xiriira:

Lab ama dhedig kii ay ahaadaanba, magacyada afsoomaaligu waxay leeyihiin dhawr siyood oo loo kooxeeyo. Waxaa ka mid ah:

- 1) magaca oo gadaal laga raaciyo (-o) sida oday & *odayo* ama norig & *nirgo*;
- 2) magaca oo gadaal laga raaciyo (-yaal) sida tuke & *tukeyaal* ama dubbe & *dubbeyaal* ama aabbe & *aabbeyaal*;
- 3) magaca oo gadaal laga raaciyo (-yo) sida gabay & gabayo ama mindi & *mindiyoy*;
- 4) magaca oo gadaal laga raaciyo (-oyin) sida waddo & waddooyin ama hooyo & *hooyooyin*;

Afartaas siyood iyo qaar kale oo aan ka boodney ayaa magacyada afsoomaaliga loo kooxeeyaa ama loo wadareeyaa. Waxaase jira habab kale oo aan afkeenna sal ku lahayn, idaacadahase aynu ka maqalno. Waxaa ka mid ah: magaca oo, si loo kooxeeyo, gadaal laga raaciyo dibkabaha (-iin); taas oo aan ku tusaalayn karayno saddexda eray ee kala ah *Falastiiniyiin, mintidiin & dagaalyahaniin*:

1. Falastiiniy (-iin): Habkani, sidiisaba, waa hab wax loo wadareeyo oo afka Carabta ka soo jeeda, dhowaanna ina soo galay. Waa magac loola jeedo carabta degta dalka Falastiin, waana eray kolkii afkaas lagu hadlaayo sidaas uu u qoran yahay sax ku ah, hase ahaatee khilaafsan xeerarka kooxaynta magacyada afsoomaaliga. Waxay la mid tahay innaga oo niraahna: *Jarmaliinta, Hidiyiinta, Ingiriisiyiinta, Talyaaniyiinta*; taas oo dhadhankeeda qaladka ah aynu si fudud ku dareemi karayno. Sidaas darteed, waxaa ila habboon ummaddaas kolkii aynu soomaalida u sheegayno inaynu ku niraahno: *dadka Reer-Falastiin* ama *Reer-Falastiin* oo keliya;

2. Mintid (-iin): Marka hore kani waa eray afsoomaali ah oo aan u baahnayn in habkan carabiga ah loo wadareeyo. Waxaan u jeedaa erayadu haddii ay afsoomaali yihiin waxay, sidii aan soo aragnay, leeyihiin hababkooda gaarka ah ee ay u wadaroobaan. Marka labaadna waa eray tilmaan ah oo keli iyo kooxba aan beddalmin. Waxaa la yiraahdaa, 'nin mintid ah' sida loo yiraahdo, '100 nin oo mintid ah.' Waa tuu ninkii gabyey lahaa:

'*Mintid* faro yar mirihii bataa kama macaashaane!'

Sidaas darteed, waxaa gef ah in la yiraahdo, 'ururro *mintidiin* ah' ama 'kooxaha *mintidiinta* ah ee dal hebel...' Waxaa habboon oo xeerarka naxwaha afkana sal ku leh in la yiraahdo, 'ururro mintid ah' iyo 'kooxaha mintidka ah ee dal hebel...';

3. Dagaalyahan (-iin): Isna waa eray afsoomaali ah oo leh qaab loo wadareeyo; kaas oo aan ahayn qaabka carabiga ah ee uu hadda u qoran yahay, warfidiyeennada qaarkoodna ay ugu tiraabaan. Wuxuu ka mid yahay magacyo, cayn ahaan, lab ah, kuna idlaada shibbaneyaasha kala ah **n, l, d, r & b**. Magacyada sidaas ah markii ay wadar noqonayaan shaqalka (**-o**) ayaa gadaal ka raaca, waxaase ku dhaca isbeddal dhinaca codka ah. Shibbanaha ugu dambeeya ayaa laballaabma. Waxaa tusaale u noqon kara: *sacab & sacabbo, gamuun & gamuunno, shabeel & shabeello, wadaad & wadaaddo, iwm*. Haddaba, erayga 'dagaalyahan' oo ku dhammaada shibbanaha 'n' wuxuu u wadaroobaa tabta kuwaas afarta ah, sidaas awgeedna '*dagaalyahanno*' ayuu noqonayaa marka wax nin ka badan lagu tilmaamaayo;

5. Eedaymo: Erayga (*eed*) waxa uu ka mid yahay kuwo uu warfidiyeenka cusubi ku turunturroodo, gaar ahaan marka uu doono inuu wadareeyo. Waa magac dheddig oo hal-alanle ah (one-syllable word), isaga oo kalena waxa uu ku kooxoobaa ama uu wadar ku noqdaa marka gadaal laga raaciyo shaqalka (-o). Aan ku tusaaleeyo, naxwe ahaan, erayadan ay isku dabeecadda yihiin: *hees & heeso, meel & meelo, seed & seedo, seef & seefo, beel & beelo, beer & beero, iwm*. Erayga '*eedaymo*' oo qaarkood ay wadarta ereayga (*eed*) ugu adeegtaani ma wadaroobi karo, maxaa yeelay magac ma aha, naxwe ahaanna waa qalad.

Waxa uu ka soo jeedaa erayga 'eedayn' oo ah masdar (infinite), masdarkuna ma wadaroobo. Sidaas darteed, erayga (*eed*) marka aynu wadar ka dhigayno wuxuu noqonayaa '*eedo*' ee '*eedaymo*' noqon maayo. Waxaa u daliil ah tuduc ku jira gabay uu Cismaan Baxnaan tiriyey oo ahaa:

'Weligaa dumaal kaa fog baad duub u xidhataaye
Dadkuna haatan waa yaabban yahay daqaqankaagiiye
Danina kuuma geynnine adaa doonta *eedaha*¹ e.'

Bal u fiirso. Wuxuu gabayaagu yiri, '*eedaha*' oo ah wadarta eed (*eedo*) oo qodob la raaciyey.

5. Qalalaasooyin, dhimashooyin & dilal: Saddexduba waa erayo aynu dharaar walba idaacadaha ka maqalno, lana yaabno. Naxwe ahaan, magaca Afsoomaaligu mar waa lab, marna waa dheddig, mar waa keli, marna waa koox, mar waa caadyaal, marna waa cillanaad, mar waa gaar, marna waa mid guud. Saddexduba waxay ka mid yihiin magacyada qaarka ay afyaqaannadu ku tilmaamaan '*uuryaallo*' oo ay ula jeedaan magacyada kuwa aan la taaban karin (abstract nouns) oo, macne ahaan, in loo garto mooyee aan muuqan karin. Waxay la mid yihiin run, been, doqonnimo, hantiwadaag, daacadnimo, iwm. Erayada sidaas ahi, afsoomaaliga markii ay jooqto, ma wadaroobaan. Waxaase hubaal ah weriyeyaasha soomaalidu inay arkeen erayadaas oo afafka shisheeye qaarkood qaab-wadareed ku leh, markaasna ay ku daydeen. Waxay la kulmeen erayada af-ingiriiska ah ee kala ah: '*riots*', '*deaths*' iyo '*killings*', dabadeedna waxay u rogeen qalalaasooyin, dhimashooyin iyo 'dilal!'

Haddii ay af-ingiriiska qaabkaas wadareed ku leeyihiin, afsoomaaliga kuma yeelan karaan. Sidaas daraaddeed saddexduba, tiro ahaan, waa magacyo *keli* ah, markii ay wax badan tilmaamayaanna waxba iskama beddalaan. Waxaad oran kartaa, "Magaalooyin dhawr ah ayaa shalay waxaa ka dhacay *qalalaase* xoog leh, sida lagu soo warramayna, *dilka* halkaas ka dhacay tiradiisa waa la yaabay, dhimashadu waa tarab-tarab oo xisaab ma laha.';

6. Dalka Ruushku waxay sheegeen: Falku (verb) wuxuu tilmaan inaga siiyaa yeelaha (subject); xagga tiradiisa iyo xagga cayntiisa labadaba. Falka ayaa laga gartaa hadduu yeeluhu keli yahay iyo hadduu koox yahay. Sidoo kale, isaga ayaynu ka ogaan karnaa haddii uu dheddig yahay iyo haddii uu lab yahayba. Sidaas darteed, haddii uu yeeluhu keli yahay, falkuna waa inuu ku tiro noqdaa oo uu keli noqdaa. Tusaale: waxaad oran kartaa, "Jarmalka iyo Faransiisku waxay *diideen* qorshaha dagaalka ee Maraykanku uu Ciraaq ku weeraray.' Hase ahaatee, ma oran karaysid, "Jarmalku waxay *diideen* qorshaha dagaalka ee Maraykanku uu Ciraaq ku weeraray". Waxaa qumman in la yiraahdo: "Jarmalku wuxuu diidey..." kolka uu yeeluhu wadar yahay sida *Jarmalka* iyo *Faransiiska*, falkuna wuu wadaroobayaa, wuxuuna noqonayaa '*diideen*', haddiise uu keli yahay waa inuu '*diidey*' noqdaa.

¹ Waxa uu tuducani ku jiraa gabay uu Cismaan u tiriyey gabayaagii weynaa ee ay walaalaha ahaayeen: Samatar Baxnaan mar uu Samatar dumaaley laba dumar ah oo, dhaqan ahaan, aanu dumaashooda lahayn.

Xeerka caynkaas ah ayay maalin walba weriyayaasha qaarkood ka tallaabsadaan. Waxaynu maqalnaa iyaga oo leh, “Dalka Ruushku waxay sheegeen...!” ama “Jamciyadda quruumuhu waxay yiraahdeen...!” ‘Dalka Ruushku’ waa keli, sidaas darteed falka ah ‘*sheegeen*’ ma uu qaadan karo. Sidoo kale, ‘Jamciyadda Quruumuhu’ iyaduna waa keli, sidaas darteed falka ah ‘*yiraahdeen*’ ma uu qaadan karo. Waxaa, naxwe ahaan, hagaagsan in la yiraahdo, ‘Dalka Ruushku wuxuu *sheegay*’ iyo ‘Jamciyadda Quruumuhu waxay *tiri*.’ Waxaa iyaduna sax ah inaad tiraahdo, ‘Qarammada Midoobey waxay *yiraahdeen*...’, maxaa yeelay falku wuxuu waafaqsan yahay yeelaha oo wadar ah: ‘Qarammada Midoobey.’

7. Laba qof (-ood): Waayadan gefaf-naxweedka afsoomaaliga dhexdiisa caanka ku noqday waxaa ka mid ah wadaraynta erayga *qof*; taas oo ka soo horjeedda xeer la yaqaan, kuna saabsan hababka kooxaynta magcyada oo si fudud la isaga dhaadhicin karo. Magacu haddii uu dhedig yahay oo tiro laga horraysiiyo waxa uu wadar noqdaa markii **(-ood)** gadaal laga raaciyo sida;

1. kab (-ta): 4 *kabood*
2. doc (-da): 3 *docood*
3. mag (-ta): 10 *magood*
4. seef (-ta): 50 *seefood*
5. beer (-ta): 15 *beerood*
6. meel (-sha): 11 *meelood*
7. beel (-sha): 12 *beelood*
8. xeeb (-ta): 60 *xeebood*

Haddiise uu magacu lab yahay, hal-alanlana yahay oo tiro laga horraysiiyo ma wadaroobo. Sida uu kelida ku yahay ayuu, markii uu hal ka batona, iska ahaadaa sida;

1. bog (-a): 2 *bog*
2. tol (-ka): 3 *tol*
3. kol (-ka): 4 *kol*
4. col (-ka): 5 *col*
5. hog (-a): 6 *hog*
6. qol (-ka): 7 *qol*
7. god (-ka): 8 *god*
8. qof (-ka): 9 ***qof***
9. qod (-ka): 10 *qod*
10. reer (-ka): 11 *reer*
11. tog (-a): 12 *tog*.

Sidaas daraaddeed, erayga *qof* haddii tiro laga horraysiiyo isma beddalo oo wadar ma noqdo, maxaa yeelay waa magac, cayn-naxweed ahaan, lab ah. Dulucda xeerku waxay tahay: in la yiraahdo **laba qofood** iyo **100 qofood** toonihi ma bannaana, maxaa yeelay, naxwe ahaan, waa qalad.

Inahaas ayaan ku deynayaa gefafka ugu muuqa dheer ee ku saabsan xagga macnaha erayada iyo naxwaha afsoomaaliga. Waa gefafka dharaar walba

weriyeyaasha idaacadaha qaarkood aynu ka maqalno, kolka ay wararka iyo warbixinnada inoo soo tebinayaan. Siday ila tahayna, tusaaleyaashii aan soo taxay waxa ay tilmaan inaga siin karaan xaddiga ay gefafkaasi leeyihiin iyo sida, haddii aan la iska hagaajin, timaaddada afkeenna ay ugu yeelan karaan saamayn aan wanaagsanayn.

D. Gebaqqabo:

Bilawga qoraalkan sidii aan ku soo xusnay, afsoomaaligu waa af hodon ah oo, murtida ballaaran ee uu xanbaarsan yahay darteed, mudan in la ilaaliyo oo dadka ku hadlaa ay xil dheeraad ah iska saaraan. Waa af wax weyn ku kordhin kara suugaanta caalamiga ah ee lagu dhaato, waase haddii uu helo aqoonyahanno u kaca oo maansadiisa quruxda badan dunida u bandhiga. Intaba waxaa igala sii weyn, waa tiirka ugu weyn *tiirarka ummadnimo* ee isku haya soomaalida Geeska Afrika ay iniba meel kaga nooshahay.

Sidaas darteed, daryeelkiisu waa xil culus oo, guud ahaan, ina saaran haddaynu nahay soomaalida waayadan nool. Hase ahaatee, xilligan qaran-jabku uu soomaalida ku socdo, xilkaas isaga ah looma sinna. Intiisa badan wuxuu dusha ka saaran yahay qoreyaasha, warfidiyeennada iyo dhammaan inta ay hawshoodu tahay inay afkaas kula xiriiraan ummadda ku hadasha.

Maantadan la joogo marka la isa sii kala reebo, warfidiyeenka idaacadaha ka hadla ayaa xilkaas weyn u sii aano ah. Isaga ayuu dadweynuhu maalin walba dhegeystaa. Isaga ayay dhallinyaradu ku dayataa, una haysataa dadka intiisa kale inuu afka ka badiyo. Isaga ayaa bulshada dhexdeeda erayo qaldan ka hirgelin kara, kuwo hagaagsanna dhegeysteyaasha dibnaha ugu tiri kara. Isaga ayaa macaanka afka soo bandhigi kara oo ina jeclaysiin kara, isaga ayaana ka dhigi kara wax aan dhegtu u hiloobin oo afafka kale ay ka door-biddo. Si uu, haddaba u guto, daryeelka afka xilka ka saaran, kolka horeba, waa inuu aqoonsadaa inuu leeyahay awoodda xaddigaas leh. Taasina waxay horseedaynaa inuu u fiirsado afka uu ku hadlaayo iyo tayada weedha uu tebinaayo. Waa inuu hubiyaa erayada uu adeegsanayaa inay, jirrid ahaan, afsoomaaliga sal ku leeyihiin, oraahda uu ku tiraabayaana ay u dhisan tahay hab waafaqsan xeerarka naxwe ee uu leeyahay.

Taasna wuxuu weriyuhu ku gaari karaa isaga oo, siday ila tahay, raaca talooyinkan soo socda ee aan ku wado inay ka kaalmayn karaan gudashada waajibka culus ee aan carrabka ku soo dhuftay:

1. Waa inuu garawsadaa afsoomaaligu, intiisa badan, inuu ka soo jeedo bulsho reer-miyi ah oo xoolo-raacato ah; hiddaheeda iyo afkeeduna ay isku xiran yihiin;
2. Waa inuu barasho joogto ah ugu jiraa taariikhda dhaqanka bulshada iyo macnaha erayada furaha u ah;
3. In kastoo aanu weli dhab u kala miirmin, haddana waa inuu aqoonsadaa inay jiraan af rasmi ah oo qoraalka iyo warbaahinta ku wanaagsan iyo 'af suuq' in xaafadaha lagaga hadlo mooyaane, aan idaacadaha iyo wargeysyada ku habboonayn. Afkaas rasmiga ahi wuu abuurmay, maantana wuu jiraa oo waa midka aynu haddaba wax ku qorno. Gefafba

- ha ka buuxeene, waa afka aynu ku aragno warbaahinta qoran iyo midda layska arko, isla markaasna aynu ka maqalno idaacadaha afsoomaaliga wax inoogu soo tebiya;
4. Inta aanu adeegsan waa inuu u dhabbe-galaa abtirsiimada erayada (etymology) iyo kuwa uu isku beddalan karo ee isku sida uu u adeegsan karo (synonymous);
 5. Si uu carrabkiisa u sofoeeyo, adeegsiga erayada habboonna uu ugu carbiyo, weriyuhu waa inuu ku dedaalaa macaansiga dhaxalka suugaaneed ee ummadda oo weliba uu kor ka qaybaa maansadii hore ee soomaalida inta ugu badan ee uu kari karo;
 6. Waa inuu bartaa naxwaha afsoomaaliga oo, shisheeyeba ha u badnaadee, wax badan laga qoray laga soo bilaabo 1903dii ilaa 1999kii;
 7. Sidoo kale, waa inuu wax badan ka ogaadaa eraybixintii afka ku soo korodhay tan iyo intii la qoray (1972) ilaa tii lagu soo saaray shirkii eraybixinta afsoomaaliga ee Jabbuuti ka dhacay sannadkan (Maarso – Mey 2002da);
 8. Ugu dambaysta, waxaan ku talin lahaa hay'adaha ama idaacadaha kala duwan ee wararkooda afsoomaaliga ku baahiyaa inay daryeelka afka qaybtooda ka qaataan oo, markii muddo la joogoba, ay abaabulaan aqoon-isweydaarsi weriyeyaasha u shaqeeyaa ay ku kulmaan; wixii gefaf loo arkona lagu hagaajiyo².

Birmingham (England); Nofembar, 2002
Idaajaa21@hotmail.com

² Raadraaca qoraalkan lagala tashaday:

1. B. W. Andrzejewski & I. M. Lewis (1964): Somali Poetry, Oxford University Press, London.
2. Yaasiin C. Keenadiid (1984): Qaamuuska af-soomaaliga, Firenze: E. Ariani/L'arte della stampa.
3. Shire Jaamac Axmed (1976): Naxwaha Af-soomaaliga, Mogadiscio, Akademiyada Dhaqanka.
4. Abdalla Omar Mansur & Annarita Puglielli: Barashada Naxwaha afsoomaaliga, HAAN Associates Publishing, London 1999.